**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
Wasaaradda Waxbarashada,
Hiddaha iyo Tacliinta Sare

# Xafiiska Horumarinta Manaahijta

*Qaabdhismeedka Manhajka Qaranka Soomaaliyeed*

**Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare**

# Qaabdhismeedka Manhajka Waxbarashada Qaranka Soomaaliyeed

**Muqdisho - Soomaaliya, 2017**

**Tusmada** **Bogga**


1. Gogoldhig 4
2. Habka hormarinta iyo fulinta qaabdhismeedka 4
3. Waxyaabaha aasaaska u ah manhajka 5
    3.1. Maxaa la barayaa ardeyda? 5
    3.2. Sidee loo barayaa ardeyyda? 6
    3.3. Ayaa la barayaa? 6
    3.4. Yaa baraya? 6
    3.5. Xaggee lagu barayaa 6
4. Qiyamka uu ku dhisan yahay manhajka 6
5. Aragtida Manhajka 7
6. Heerarka Manhajka Waxbarashada 8
7. Mirodhalka Guud ee Heer Kasta 9
    7.1. Mirodhalka Waxbarashada Dugsiga ka hor 9
    7.2. Mirodhalka Waxbarashada Asaasiga ( hoose ) 9
    7.3. Mirodhalka Waxbarashada Asaasiga (Dhexe ) 10
    7.4. Mirodhalka Waxbarashada Dugsiga sare 10
    7.5. Waxbarashada baahida gaar ah 10
8. Aqoonta Asaasiga ah, Fahamka iyo Xirfadaha 11
    8.1. Maaddooyinka asaasiga ah iyo Arrimaha xoogga la saarayo 11
    8.2. Xirfadaha muhiimka u ah manhajka 12
        b) Xirfadaha - nololeed 13
        t) Xirfadaha Barashada iyo Fikirridda 13
        j) Xirfadaha shaqo 13
9. Qaybaha Waxbarasho iyo Mirodhalka Barashada ee Laga filaayo heer kasta 13
    9.1. Afafka 13
    9.2. Sayniska 19
    9.3. Xisaabta 22
    9.4. Cilmiga Bulshada
    9.5. Farshaxanka 24
    9.6. Daraasaadka Islaamka 25
    *9.7.* Waxbarashada Barbaarinta jirka ka 27
    *9.8.* Tiknoolijiyadda 28
    *9.9.* Maaddada Taariikhda 29
    *9.10.* Maaddada Juqraafiga 30
    9.11. Maaddada Kemistiriga 31
    9.12. Maaddada Bayolojiga 33

*9.13.* Maaddada Fisikiska 35
9.14. Maaddada Ganacsiga 35
10. Siyaasadda Afka lagu Bixinaayo Manhajka 36
11. Hababka Baridda iyo Barashada 36
12. Hababka Qiimeynta 36
13. Kaalinta Wasaaradda Waxbarashada 37
14. Maal gelinta Manhajka 38
15. Xilli - dugsiyeedka iyo saacadaha ugu yar ee waxbarista 38
16. Erey-bixinnada erayada farsamo ee la adeegsaday 39
- Qaabdhismeedka manhajka 39
- Qiyaamka 39
- Yoolka 39
- Ujeeddooyinka guud iyo kuwa gaarka ah 39
- Mirodhalka barashada 39
- Hanashada 40
- Heerarka 40
- Muqararka 40

# QAABDHISMEEDKA MANHAJKA QARANKA SOOMAALIYEED

## 1. Gogoldhig

Qaabdhismeedka Manhajka Qaranka Soomaaliyeed (QMQS) waa qoraal qeexaya sida ay u dhisan tahay waxbarashada (manhajka) dalka iyo tiirarka waweyn ee saldhigga u ah. Manhaj Soomaaliyeed oo shaqeynaya waxaa u dambeysay 26 sano ka hor. Muddadaas oo inta badan dalku ku jiray degganaansho la'aan iyo dawlad la'aan. Waxaana wax lagu baranayay muqararaad iyo buugaag kala gadisan oo laga keenay dalal kala duwan oo ujeeddo kala duwan ka leh waxbarashada iyo mirodhalkeeda.

Dhanka kale, manhajkii hore ee Soomaaliya waxaa la qoray 1984kii. In kastoo hay'adaha UNICEF iyo UNESCO iyagoo la kaashanaya aqoonyahanno Soomaaliyeed ay isku dayeen in ay dib u habeyn ku sameeyaan muqararkii iyo buugaagtii heerka asaasiga ah ee manhajkii hore, haddana wax dib u eegis ah laguma sameyn Manhajkii Qaranka Soomaaliyeed. Muddadaasi Soddon sano ku dhowaadka ah waxa adduunka ka dhacay isbeddello fara badan oo saameynaya waxbarashada. Haddaba, waxaa cad in loo baahan yahay in la helo manhaj soomaaliyeed oo la jaan qaadi kara isbeddellada ka socoda adduunyada.
Waxaa kaloo xusid mudan in manhajkii hore ee Soomaaliya uu ahaa mid ku saleysan maaddo (content based), adduunyaduna waxa ay maanta u guuraysaa habab cusub sida mid ku saleysan miro-dhal (outcome based) oo la rumeysan yahay in uu ka waxtar roon yahay kan ku salaysan maaddada marka laga eego xagga baridda iyo barashada. Taasi ayaa haddaba wax ay na tusinaysaa in baahi loo qabo in la diyaariyo manhaj ku saleysan qaab cusub.

Qaabdismeedka manhajkan wuxuu qeexayaa muwaadiicda, xirfadaha iyo qiyamka ay tahay in lagu fududeeyo manhajka iyada oo loo marayo qaybaha waxbarashada tooska ah iyo midda gaarka ah wuxuuna xaqiijinayaa himilooyinka qaran ee waxbrashada kuwaas oo saameeynaya muwaadiicda ay tahay in lagu qaato qaybaha barashada ee kala duwan ee lagu xusay manhajka dugsiga.

Ugu dambeyn waxa aan la wada soconaa in dalkeena ay ka dhaceen dagaallo sokeeye oo aad loogu hoobtay muddo dheerna socday. Waxaa xaqiiqo ah markaa in loo baahan yahay manhaj xallin kara dhibaatooyinkaas soona saari kara ummad jecel nabadda iyo wadajirka .
Sidaas darteed , iyada oo la tixgelinayo arrimaha aan kor ku soo sheegnay, waxaa muhiim ah in la helo manhaj Soomaaliya leedahay. Haddaba, iyada oo ka shidaal - qaadaynaysa arimaha kor ku xusan , waxa Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare ay garatay in la sameeyo manhajkan cusub oo la filaayo in dhibaatoyinka la soo xusay uu xallin karo.

## 2. Habka horumarinta iyo fulinta qaabdhismeedka Manhajka

Qaabdhismeedka manhajkan wuxuu sharax guud ka bixinayaa qaabdhismeedka manhajka dugsiyada dalka. Majallada barashada iyo waxa laga filaayo guud ahaan waxaa saldhig u ah diyaarinta muqararada maaddo kasta oo ay la socdaan waxa sida gaarka ah looga filanaayo barashada maaddo kasta. Qaabdhismeedkan wuxuu ka dhashay wada tashiyo ballaaran oo lala sameeyey bulshada qeybaheeda kala duwan sida aqoonyahannada, culumada, dhallinyarada, haweenka iyo mas'uuliyiinta dowladda. Haddaba, habka wadatashiyada diyaarinta iyo soo saarista nuqulkan waa:

- Doodo iyo falanqayn ka dhex dhacday guddiga farsamada iyo shaqaalaha wasaaradda..
- Wada tashiyo ballaaran oo lala sameeyay qaybaha bulshada kaddibna isbedelo lagu sameeyay nuqulkii hore, si loo waafajiyo jawaabaha ka soo baxay wadatashiyada.
- Nuqulkan ugu dambeeya waxaa lagu ansixin doonaa shirweyne qaran.
- Waxaa la sameeyay guddiyada maadooyinka oo soo diyaarinaya muqarar ku saleysan qeybaha barashada iyo waxa guud ee laga filaayo barashada iyagoo raacaya qaadhismeedkan.
- Manhajka iyo muqarrarrada cusub waxaa lagu hubinayaa lana barbardhigayaa agabka barashada ee la heli karo lana awoodi karo.
- Fulinta manhajka cusub waxaa la bilaabi doonaa sannad-dugsiyeedka 2017/18.

## 3. Waxyaabaha aasaaska u ah Manhajka cusub

Waxbarashadu waa furaha horumarka. Haddaba, waa in ay ahaataa waxbarasho tayo leh oo keeni karta natiijo ku haboon waxbarashada iyo dhaqanka bulshada. Waxaana aas aas u ah:

- In lagu caawiyo dalkeena iyo dadkeena in ay horumaraan.
- Inuu la socdo isbedellada joogtada ah ee tignoolojiyada, hababka baridda, barashada, iyo waxa la baranaayo kana tarjumo siyaasadda waddanka, diinta, dhaqanka bulshada iyo horumarka.
- Inuu soo saaro arday Soomaaliyeed oo ka dhisan aqoonta, xirfadaha, iyo itijaaha; diinta, dhaqanka, iyo waddaniyadda.
- Inuu ka qeybqaato koboca dhaqaalaha iyo horumarinta bulshada.
- Inuu xalliyo mushkiladaha dalka ka jiro, abuurana isku kalsooni Soomaalinimo.
- Inuu baro ardeyda xuquuqda uu waddanka ku leeyahay iyo waajibaadka iyaga lagu leeyahay.

- Manhajka cusub ujeedkiisu waa in uu caawiyo dib u qaabaynta iyo casriyeynta nidaamka waxbarashada dalka, lana xaqiijiyo in ardeyda ka aflaxda ay la jaan qaadi karaan qarnigan 21aad
- Inuu ku caawiyo kuna dhiirrigeliyo carruurta iyo dadka kale in ay ku noolaadaan nolol nabdoon, farxad iyo caafimaad leh taas oo ku dhisan saldhig adag oo qiyamka islaamka ah;
- Inuu ku caawiyo ardeyda kobcinta iyo gaaridda himiladooda
- Inuu u diyaariyo carruurta nolol shaqo hal abuureed oo miro dhal ah;
- Inuu u diyaariyo caruurta in ay noqdaan muwaadiniin fir-fircoon ee la socda isbadallada dunida;

### 3.1. Maxaa la barayaa ardeyda?

- Waxa muhiim ah isku dheellitirka ka dhexeeya barashada qayb kasta oo aqooneed, itijaah iyo barashada xirfadaha.
- Waxa jiri doona waxyaabo lagama maarmaan u ah mustaqbalka kuwaasi oo muhiim u ah qof kasta in uu barto, sida akhriska iyo qoraalka iyo sida loola jaanqaado isbedallada ka dhasha tiknoolajiyada casriga ah.
- Waxa kaloo jiri kara majallo gaar ah oo dad khaas ah ay daneeyaan waafaqsanna diinta iyo sharciga dalka.
- Dad kala duwan ayaa daneeya oo ku fiican meelo kala duwan, ha ahaadaan maaddooyinka caadiga ah, xirfadaha mihniga ah, ama waxyabaha kale ee qofku ku fiican yahay. Iyada oo taasi maskaxda lagu hayo, waxa muhiim ah in tixgelin la siiyo nooca aqoonta iyo xirfadaha ay da’ yartu u baahan yihiin si ay u noqdaan dad waxtar leh.
- Isbeddellada ku dhacaya sida aan u nool nahay una shaqeyno, xiriirka ka dhexeeya dadka iyo saameynta ay teknolojiyada casrigu keentay dhammaan waxa ay saameynayaan waxa da’yartu ka doonayaan dugsiyada.

### 3.2. Sidee loo barayaa?

- Manhajku wuxuu ku saleysan yahay sida ay carruutu wax u bartaan.
- Sanadahan waxa jiray cilmi baaris badan oo lagu sameeyey sida ay u shaqayso maskaxda carruurta. Iyada oo arintaasi laga shidaal qaadanayo waa in aan ku caawinaa carruurta in ay noqdaan kuwo sameeya waxqabad ku saleysan hal abuur iyo cilmibaaris wax kasta oo ay samaynayaan.
- Farsamada casriga ah (Tiknolojiyada) waxa ay ku socotaa xawaare aad u dheereeya, haddaba waa in looga faa'iideystaa waxbarashada.

### 3.3. Kuma la barayaa?

- Qof kasto oo Soomaali ah xaq buu u leeyahay inuu wax barto.

Dhammaan carruurta waxa ay xaq u leeyihin waxbarasho ku saleysan tiknolojiyada casriga. Waxa la doonayo in la wajaho waa in qof walba lagu caawiyo sidii uu u heli lahaa waxbarasho u horseedda nolosha ugu wanaagasan.

### 3.4. Yaa Baraya?

- Waxaa wax baraya bare leh aqoon iyo xirfad waxbarid awoodna u leh in uu fuliyo manhajka waxbarasho ee loogu tala galay in lagu dhiso mustaqbalka ubadka Soomaaliyeed.
- Bare taba-baran, heystana daryeel iyo nolol ku filan.
- Bare buuxiyay shuruudaha macallinimada ee ku xusan siyaasadda macallinnimada qaranka.

- **3.5 Xaggee lagu barayaa?**

- Waxaa lagu barayaa goob ku habboon barista iyo barashada sida ku xusan siyaasadda goobaha waxbarasho.
- Goob waxbarasho oo leh agabkii waxbarashada oo ay ku jiraan sheybaaro, maktabad, garoomo ku habboon heerka ardeyda.

## 4. Qiyamka uu ku dhisan yahay manhajka

Qaab dhismeedka manhajkani waxa uu ku saleysan yahay kana turjumayaa qiyamka ay ku dhisan tahay bulshadeenna oo ay ka mid yihiin:

- Aqoonsiga, ku barbaaridda iyo ku dhaqanka qiyamka islaamka.
- Horumarinta iyo jaceylka, dalka, dadka, hiddaha iyo dhaqanka.
- horumarinta dhaqanka nabadda, isdhexgalka, wada-noolaashaha, iskaashiga, iwm.
- Ixtiraamidda iyo qiimaynta xuquuqaha dadka oo dhan ayadoon loo eegeynin jinsi, karti iyo kaalin bulsho, ama degaan.
- Dhowrista iyo ilaalinta deegaanka, muuqaallada dabiiciga ah iyo kuwa taariikhiga ah.
- Horumarinta maskax furnaanta iyo xirfadaha xallinta mushkiladaha.
- Horumarinta dhaqanka ixtiraamidda xirfadda iyo xirfadlaha.
- Dhisidda bulsho xor ka ah qabyaaladda.

## 5. <u>Argatida Manhajka.</u>

Waxaa dhab ah in ummad kasta ay waxbarashadeedu ku saleyso waxa ay aaminsan tahay diin ahaan, ummad ahaan iyo aragtideeda ku aaddan adduunka, bani aadamka iyo nolasha guud ahaanba.

Haddaba, maadaama ay Soomaaliya tahay waddan Muslim ah waxey aragtida waxbarashadeedu ku dhisan tahay laba tiir oo kala ah:


A) Muslimnimo oo ah caqiidada iyo aragtida islaamku ka bixinaayo adduunka, bani'aadamka iyo nolasha guud ahaan.

B) Soomaalinnimo oo ah baahideenna iyo jiritaankeenna dhanka qoowmiyadda iyo ummadnimada.

Sidaas darteed waxbarashadeennu waa in ay ahaato mid:

1) Dareensiineysa qofka kaalinta uu ku leeyahay uunka iyo xilka illaahay saaray;
2) Ilaalineysa, kobcineysa qiyamka islaamka iyo dhaqanka suubban ee ummadda Soomaaliyeed iyadoo lala falgalaayo lagana faa'iideysanaayo ummadaha kale.
3) Isku xiran oo muujineysa isla jaanqaadka diinta iyo cilmiga, xisiga iyo sharciga, tijaabo cilmiyeedka iyo iimaanka, adduunka iyo aakhirada.

Qaabdhismeedka manhajkan cusub wuxuu ku dhisan yahay aragtida habka saddex jihoolaha dheellitiran (3 dimentional): marka uu heerku kordho waxaa sii korodhaya loollanka, baahsanaanta iyo xirfaddaha barashada sida ka muuqato jaantuska 1aad. Tani waxey ka duwan tahay manhajkii hore oo ku dhisnaa loollanka barashada iyo kororka heerka sida ka muuqato jaantuska 2aad.






***Jaantuska 1: Qaabdhismeedka manhajka cusub***
***Jaantuska 2: Qaabdhismeedka manhajkii hore***

## 6. HEERARKA MANHAJKA WAXBARASHADA

b) Siyaasadda waxbarashada qaranka ayaa u xakameyneysa heerarka waxbarashada dugsiyada sida soo socoto:
- Dugsi Quraanka iyo Xannaanada - laba sano
- Dugsiga aasaasiga - siddeed sano (4 hoose, 4 dhexe)
- Dugsiga sare afar sano

t) Manhajka waxaa uu qaatey habkan, hase yeeshee iyada oo loo fiirinaayo xaqiijinta la socodka natiijooyinka barashada oo ballaaran awgeed waxbarashada asaasiga waxa loo qaybiyey laba heer (dugsi hoose iyo dhexe ) oo min afar fasal ah, heer waliba waxa uu leeyahay mirodhal barasho ballaaran oo la doonayo in la gaaro.

j) Afarta heer waxbarasho ee ballaaran waxa si isle'eg loogu dabaqayaa waxbarashada tooska ah iyo waxbarashada baahida gaarka, inkastoo tirada ardeyda, saacadaha, iyo habka hirgelinta ay ku kala duwanaan karaan marka loo eego baahiyaha iyo garaadka bartaha.

**Tusaha 1: Heerarka Manhajka**

| Waxbarashada tooska | Heerka Manhajka | Heerka Waxbarashada |
|---|---|---|
| **Jaamacad** | Heerarka dugsiga ka dib | |
| **12** | **Heer 4** | |
| **11** | | |
| **10** | | |
| **9** | | |
| **8** | **Heer 3** | |
| **7** | | |
| **6** | | |
| **5** | | |
| **4** | **Heer 2** | |
| **3** | | |
| **2** | | |
| **1** | | |
| **Dusi Qur'aan ama xannaanada** | **Heer 1** | |

# 7. MIRODHALKA GUUD EE HEER KASTA

## 7.1. Mirodhalka Waxbarashada Dugsiga ka hor

Waxyaabaha soo socda waa natiijooyinka laga filaayo waxbrashada carruurnimada hore.
Carruurtu waa iney:

- Leeyihiin aqoonta aasaasiga ee qur'aanka kariimka iyo luqadda carabiga. leeyihiinna dareen jaceyl diinta islaamka.
- ka kobacsan yihiin dhanka asluubta iyo anshaxa wanaagsan
- ku tababaran yihiin waalid jaceylka, macalimiiiinta, dalka, deriska iyo dadka kaleba.
- Sare u qaadan tahay xiriirka ay la leeyihiin bulshada
- ka dhisan yihiin jir iyo maskax ahaanba
- leeyihiin dareen waddaniyad iyo dal-jaceyl u diyaarsan yihiin bilaabidda waxbarashada dugsiga hoose.

## 7.2. Mirodhalka Waxbarashada Asaasiga ( Dugsiga hoose )

Waxbarashada asaasiga waa asaaska ka guul gaaridda waxbarashada carruurta Soomaliyeed. Dhammaadka waxbarashada dugsiga hoose ardeyda waxa laga filayaa in ay:

- Xambaarsan yihiin aqoonta diinta islaamka aasaasiga ah, qiyamka wanaagsan iyo waddaniyadda.
- Ka dhisan yihiin xirfadaha jireed, maskaxeed iyo ruuxeed oo la socda aqoon iyo xirfado wax qabad ah.
- Kasbadeen aqoonta, aragtiyada, xirfadaha, kartida iyo qiyamka munaasibka ku ah heerkan, kuwaasi oo awood u siiya in ay ku xaqiijiyaan hammigooda iyo in ay wax ku soo kordhiyaan bulshada.
- ka horumarsan yihiin xirfadaha akhriska, qoraalka, dhageysiga iyo ku hadalka afafka soomaaliga, carabiga iyo ingiriiska ee ku habboon heerkan.
- Kasbadeen waxyaabaha asaaska u ah tirooyinka iyo in xisaabta u adeegsan karo xallinta mas'alooyinka la xiriira noloshooda.
- garowsan yihiin waxtarka qoyska, bulshada, horumarka dalka iyo isku tiirsanaanta qaybaha kala duwan ee bulshada Soomaliyeeed.
- kasbadeen waxyaabaha saldhigga u ah sayniska lehna dhaqan fikir iyo halabuur leh.
- yaqaannaan waxyaabaha aasaaska u ah cilmiga bulshada.

### 7.3. Mirodhalka Waxbarashada Asaasiga ( Dugsiga Dhexe )

Waxbarashada asaasiga waa asaaska ka guul gaaridda waxbarashada carruurta Soomaliyeed. Dhamaadka waxbarashada dugsiga dhexerdayda waxa laga filayaa in ay:

- xambaarsan yihiin aqoonta diinta islaamka aasaasiga ah, qiyamka wanaagsan iyo waddaniyadda.
- ka dhisan yihiin xirfadaha jireed, maskaxeed iyo ruuxeed oo la socda aqoon iyo xirfado wax qabad ah.
- kasbadeen aqoonta, aragtiyada, xirfadaha, kartida iyo qiyamka munaasibka ku ah heerkan, kuwaasi oo awood u siiya in ay ku xaqiijiyaan hammigooda iyo in ay wax ku soo kordhiyaan bulshada.
- ka horumarsan yihiin xirfadaha aqriska, qoraalka, dhageysiga iyo ku hadalka afafka soomaaliga, carabiga iyo ingiriiska ee ku habboon heerkan.
- kasbadeen waxyaabaha asaaska u ah tirooyinka iyo in xisaabta u adeegsan karo xallinta mas'alooyinka la xiriira noloshooda.
- garowsan yihiin waxtarka qoyska, bulshada, horumarka dalka iyo isku tiirsanaanta qaybaha kala duwan ee bulshada Soomaliyeeed.
- kasbadeen waxyaabaha saldhigga u ah sayniska lehna dhaqan fikir iyo halabuur leh.
- yaqaannaan waxyaabaha aasaaska u ah cilmiga bulshada, taariikhda iyo juquraafiga dalka.

### 7.4. Mirodhalka Waxbarashada dugsiga sare

Waxbarashada dugsiga sare waa asaaska ka guul gaaridda waxbarashada ka dambeysa dugsiga sare iyo xaqiijinta nolol shaqo.Dhamaadka waxbarashada dugsiga sare ardeyda waxaa laga filayaa in ay:

- kasbadeen qiyam anshax wanaagsan, wadaniyad iyo xirfado ku habboon heerkooda.
- ka dhisan yihiin ruuxadda, maskaxda, akhlaaqda ku saleysan dhaqanka islaamka si wax ugu soo kordhiyaan horumarka bulshada.
- ku qalabeysan yihiin aqoon, xirfado, fikrado iyo aragtiyo ku filan si ay awood ugu yeeshaan xaqiijinta hamigooda..
- yihiin kuwo dheellitiran, leh aqoon iyo xirfad tusaalena u noqon kara bulshada.
- kasbadaan aqoonta looga baahan yahay si ay ugu talaabsan karaan sii wadashada waxbarashada sare gudaha iyo dibadda.
- yihiin kuwo ku firfircoon howlaha ka baxsan manhajka ee gudaha dugsiga iyo dibaddiisaba.
- yihiin kuwo ku fiican aqoonta dalka, hogaaminta wanaagsan,fikir halabuur leh iyo xallinta khilaafaadka.

### 7.5. Waxbarashada baahida gaarka ah

Mirodhalka waxbarashada baahiyaha gaarka ah waxey la mid tahay kuwo hoose, dhexe, iyo sare. Haddaba si loo gaaro mirodhalkaas waxaa lagama maarmaan ah in ay:

- Wasaaradda waxbarashada siiso waxbarasho gaar ah dadka maskaxda ama jirka naafada ka ah sida dadka aan wax maqlin ama arkin.
- Carruurta naafada ah la siiyo waxbrasho gaar ah iyada oo loo fiirinaayo baahidooda laguna caawiyo sidii ay u gaari lahaayeen isku filaansho.
- Wasaaraddu bixisaa waxbarashada baahida gaarka ah ee dugsiyada la wada dhigto intii suuragal ah.
- Wasaaraddu soo saarto sharciyo la xiriira:

    - Muddada waxbarasha asaasiga iyo sare ee ku habboon baahiyaha ardeyda si ay u helaan waxbarashada gaarka ah
    - Agabka la adeegsan doono marka loo eego waxbarashada gaarka ah
    - Qaybaha carruurta u baahan waxbarashada gaarka ah iyo habka ku habboon waxbarashada carruurta ee qayb kasta oo ka mid ah dugsiyada gaarka ah,
    - Iyo wixii kale ee lagama maarmaanka u ah arrintan.

## 8. AQOONTA ASAASIGA AH, FAHAMKA IYO XIRFADAHA

### 8.1. Maaddooyinka asaasiga ah iyo Arimaha xoogga la saari karo

Manhajkeennu waa in uu aad u xeeldheeraadaa si uu u daboolo dhammaan qaybaha kala duwan ee aqoonta iyo xirfadaha aadanaha. Barista maaddooyinka manhajka ee soo socda iyo qodobka kale ee ku jiri kara maaddooyinka oo dhan waa in laga helaa heer kasta. Waxa la barayo ardeyga waxaa lagu aruurin karaa hal maado ama waxa loo qeybin karaa dhowr maado marka heerka adkaado ama kordhaba, iyadoo loo eegayo baahida ardeydu. Tani waxa ay dhacaysaa marka muqarrarada loo dejinaayo qaabdhismeedkan.

**Tusaha 2: Maaddooyinka asaasiga ah iyo kuwa baahsan ee Dugsiga Hoose/Dhexe**

| Maaddooyinka asaasiga ah | Mowduucyadan waa in ay ku dhex jiraan maaddooyinka oo dhan |
|---|---|
| 1. Tarbiyada Islaamka | 1. Caafimaad, fayadhowr.<br>2. Waxbarashada nabadda<br>3. Waxbarashada deegaanka<br>4. Barashada Wadaniyada<br>5. Xuquuqda aadanaha iyada oo loo eegayo Islaamka<br>6. Qataraha maandooriyayaasha iyo walxaha Qarxa (Miinada iyo wixii la mid ah)<br>7. Khayraadka dalka: Kaluumaysiga, xoolaha, Beeraha iyo macdanta.<br>8. Ganacsiga<br>9. Xallinta mushkiladaha. |
| 2. Saynis | |
| 3. Xisaab | |
| 4. Afka Soomaaliga | |
| 5. Afka Carabiga | |
| 6. Afka Ingiriiska | |
| 7. Cilmiga Bulshada | |
| 8. Farshaxan | |
| 9. Barbaarinta jirka ka | |
| 10.Tiknoolojiyada | |

**Tusaha 3: Maaddooyinka asaasiga ah iyo kuwa baahsan ee Dugsiga Sare**

| Maaddooyinka asaasiga ah | Mowduucyadan waa in ay ku dhex jiraan maaddooyinka oo dhan |
|---|---|
| 1.Tarbiyada Islaamka | Caafimaad, fayadhowr.<br>Dhaqaalaha guriga<br>Waxbarashada Nabadda iyo Xalinta Khilaafaadka<br>Waxbarashada deegaanka<br>Barashada Wadaniyada<br>Xuquuqda aadanaha iyada oo loo eegayo Islaamka<br>Qataraha maandooriyeyaasha iyo walxaha Qarxa (Miinada iyo wixii la mid ah)<br>Khayraadka dalka: kaluumaysiga, xoolaha, beeraha, iyo macdanta |
| 2.Baayoloji | |
| 3.Kimisteri | |
| 4.Fiisikis | |
| 5.Xisaab | |
| 6.Afka Soomaaliga | |
| 7.Afka Carabiga | |
| 8.Afka Ingiriiska | |
| 9.Taariikh | |
| 10.Juquraafi | |
| 11.Tiknoolojiyada | |
| 12.Barbaarinta jirka ka. | |
| 13. Ganacsiga | |

### 8.2. Xirfadaha Muhiimka u ah manhajka

- Manhajkani waxa ku dhex jira xirmooyin xirfado ah oo u suurageliya ardeyda in ay ku dabbaqaan aqoontooda iyo fahamkooda dunida casriga ah.
- Xirmooyinkan xirfadaha ah waa ay isku soo noq-noqdaan, waxa ayna ku dhex jiraan maaddooyinka la barto oo dhan.
- Waa xil ka saaran qorayaasha muqirarka ee maaddo kasta in ay ku daraan xirfadahan iyo mowduucyada kale ee muqirarka maaddooyinka iyo waxqabadyada oo dhan.

**Dugsiyada xirfadahamuhiimka ah ee loo baahan yahay in la abuuro.**
Beeraha, xanaanada xoolaha, farsamada gacanta, isgaarsiinta, tiknoolajiyadda casriga, kaluumeysiga iyo caafimaadka.

**Tusaha 3: Xirfadaha muhiimka u ah Manhajka**

| Xirfadda | Tusaale |
|---|---|
| Xirfadaha nolosha | Dabeecadaha qofka, dhisidda xiriirka qofka, wada nolaansho, dabacsanaan, laqabsi, go'aan qaadasho, xallinta mushkiladaha, xallinta khilaafaadka, xirfado ganacsi, isqadarin, |
| Xirfadaha barashada | Akhris –qoraal, tirinta, saafid, hal abuurid, baaris, qiimayn xeeldheer, su'aal iyo jawaabo, xusuus iyo jawaabcelin |
| Xirfadaha shaqo | Nidaamsanaan,, maareyn, hogaamin, qorsheyn, koox u wada shaqayn, ganacsi,aftahan,codkar |

**b) Xirfado - nololeed**

Dadku waxa ay hadda ku dhex nool yihiin deegaan teknoloji iyo warbaahin xoog badan oo la helo xogo badan
oo isbeddello dhaqso badan awood loo leeyahay in la sameeyo ka qayb qaadasho qofeed iyo mid wadaag ah xad aan hore loo arag. Si loo noqdo dad waxtar leh waa in la awoodaa in la soo bandhigo silsilado xirfado shaqo iyo fakir xeeldheer oo la xiriira cilaaqaadka, xogta, warbaahinta iyo teknolojiyada.
Dadku waa in ay qaabeeyaan oo ay joogteeyaan shakhsiyad wanaagga, wada-xiriiridda, bulshanimada, soo bandhigaan isku kalsoonaan naftooda, xiisagelinta naftoodaa, muujiyaan adkeysi marka ay la kulmaan caqaqbado iyo dib u dhacyo, fahmi karaan dareenka dadka kale lana qeybsadaan shucuurtooda, tixgeliyaan fakarka qofka kale, aragti dheer leh, sameeyaan qorshaha noloshooda, shaqadooda iyo tan qoyskoodaba.

### t) Xirfadaha Barashada iyo Fikiridda

Xirfadaha Barashada iyo Fikiridda ayaa loo aqoonsaday iney yihiin kuwo lagu kala saari karo dadka u diyaarsan nolosha adag iyo goobaha shaqo ee qarniga 21aad iyo kuwa aan u diyaarsaneyn.
In diiradda la saaro hal-abuuridda, fakarid xeeldheer, wada xiriiridda iyo iskaashiga ayaa laga maarmaan ah si ardeyda loogu diyaariyo mustqabalka.

### j) Xirfadaha shaqo

Xilligan la joogo goobaha shaqo waxa ay u baahan yihiin wax ka badan xirfado fakireed iyo aqoon. Si loo helo awood looga gudbi karo howlaha adag ee shaqo ee ka dhex jira caalamkan ku tartamaya tiknoolajiyada casriga ah, waxaa loo bahan yahay dadku in ay ahaadaan kuwo dabacsan, lana qabsan kara isbeddalka xaaladaha, abuurran karaanna shaqooyinkooda haddii fursadaha shaqo ay yaraadaan.

## 9. QAYBAHA WAXBARASHO IYO MIRODHALKA BARASHADA EE LAGA FILAAYO HEER KASTA

Qaybtani waxa ay ina siineysaa qaybaha barashada iyo mirodhalka barashada laga filaayo heer kasta ee waxbarashada tooska ah iyo tan baahida gaarka ah ee dugsiyada asaasiga iyo sare. Mirodhalka barashada waxa ay noqonaysaa asaaska lagu horumarinayo muqararka maaddo kasta ee dugsiyada asaasiga ah. Manhaj qoreyaasha ayaa mirodhalka barashada u isticmaali doona bartilmaameed ahaan.
Muqararrada ayaa sii qeybinaya mirodhalka barashada gaarka u ah sanad kasta oo ay la socdaan waxqabadyada iyo mowduucyada.

### 9.1. Afafka

Waxbrashada Soomaaliya waa seddex luqadley, iyada oo afafka Soomaliga, Carabiga iyo Ingiriisiga ay yihiin kuwo muhiim u ah baridda iyo barashada. Caruurta Soomaaliyeed waxa ay u baahan yihiin in ay si fiican u bartaan saddexda luqadood iyo iney u adeegsan karaan ugu yaraan laba luqadadood oo ka mid ah luqadahan waxbarashadooda iyo iney ku kasbadaan aqoon.

Maadaama uu Af-soomaaligu yahay luqadda koowaad, akhris - qoraalkiisa ( fluency) waa asaaski ay ku dhismi lahaayeen luqadaha kale, waana furaha maaddooyinka.

Af-Soomaaligu waxa uu soconayaa laga bilaabo xannaannada ilaa Fasalka 12aad ee dugsiga sare.
Luqaduhu waxa ay muhiim u yihiin waxbarashada iyo bulshada. Haddaba, bilowga hore akhris - qoraalka iyo fakir dhisiddu waa in lagu kobciyaa af-

somaaliga ka dib loo gudbaa luqadaha Carabiga iyo Ingiriisiga inta uu bartuhu ku guda jiro dugsiga asaasiga si ay ugu suuragasho in uu wax ku barto dugsiga sare iyo jaamacadaha afafka Carabiga ama Ingiriiska.

**Tusaha 4: Mirodhalka Afafka**

| **Afafka** | **Dugsi hoose** Dhammaadka heerkani qodobbadan waaweyn ee soo socda ayaa la filayaa in la gaaro | **Dugsiga dhexe** Dhammaadka heerkani qodobbadan waaweyn ee soo socda ayaa la filayaa in la gaaro | **Dugsiga sare** Dhammaadka heerkani qodobbadan waaweyn ee soo socda ayaa la filayaa in la gaaro |
|---|---|---|---|
| **Af-soomaali** | Ardeydu waxa ay:<br>• yaqaanaan akhris –qoraalka asaasiga ah ee af-soomaliga<br>• Yaqaanaan qorista, akhriska, maqalka iyo dhageysiga afka Soomaaliga islamarkaana si fiican u kala yaqaanaan shaqalladda shibbanayaasha & xarfaha laban laabma.<br>• Awoodaan in ay si fiican u akhriyaan, qoraan, hingaadiyaan af-soomaaliga.<br>• Akhriyaan sheekooyin, heeso howleed iyo gabayo | Ardeydu waxa ay:<br>• Awoodaan in ay hadal iyo qoraal ku gudbiyaan aragtidooda iyaga oo ku saleynaya sababo.<br>• Fahmaayaan yaqaanaan) qayb ka mida ah gabayada, heesaha iyo suugaanta qaybaheeda kala duwan.<br>• ka dhisanyihiin dhammaan qaybaha afka Soomaaliga.<br>• Sharxayaan, kana hadlayaan waxa iyaga, bulshadooda, deegaankooda iyo dalkooda ku saabsan.<br>• Curinayaan sheekooyin gaagaaban.<br>• Fahamsan yihiin | Ardeydu waxa ay:<br>• Awoodaan iney hantiyaan naxwaha, suugaanta, gudbinta aqoonta, curinta qoraallo iyo gabayo.<br>• Dhaliilayaan oo qiimeynayaan qoraallo ay akhriyeen ama xog loo sheegay.<br>• Yaqaanaan adeegsiga naxwahaiyo macnaha qaybaha suugaanta oo ay kala saaraan waxa ay xambaarsan tahay.<br>• Sheegayaan waxa ay sarbeebtu tahay |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | fudud.<br>• fahamsan yihiin tilmaamaha ku saabsan ardeyda, qoyska, dugsiga, iyo deegaanka.<br>• ka kobocsan yihiin xirfadaha dhageysiga qoraalka, akhriska iyo ku hadalka.<br>• Astaameeyaan waxa ay qoraan isla markaana si sax ah u adeegsanayaan naxwaha af-soomaaliga.<br><br>• Leeyihiin dhaqan wax akhris joogta ah.<br>• Iney yaqaanaan sida loo isticmaalo qaamuuska. | gabayo la xiriira suugaanta Soomalida.<br>• Akhrinayaan buugaagta iyo wararka iyo xog kasta oo ku qoran af-soomaaliga.<br>• Awoodaan in qoraallo ku qoran af soomaali si fiican u akhriyo,<br>• awoodaa in ay fakirkooda ku qoraan afka soomaaliga iyaga oo sababaynaya islamarkaana dhawraya astaamaynta qoraalka,<br>• Fahamsan yihiin, kalana soo baxayaan dulucda suugaanta iyo qoraallada.<br>• Leeyihiin dhaqan wax akhris oo joogta ah.<br>• Awoodaan iney qaamuuska kala soo bixi karaan ereyada ay u baahan yihiin. | • leeyihiin awood ay kula soo baxaan murtida ay ku fadhido suugaanta.<br>• Curinayaan qoraallo iyo sheekooyin<br>• Ka warcelinayaan waxa ay soo akhriyeen<br>• Leeyihiin dhaqan wax akhris oo joogta ah. |
| **Afka-Ingiriisiga** | Ardaydu waxa ay:<br><br>• Fahmayaan kana jawaabayaan salaamaha, weedhaha gaagaaban ee ku saabsan iyaga, qoyska, dugsiga iyo deegaankooda. | Ardeydu waxa ay:<br><br>• Awoodaan akhris – qoraalka asaaska u ah afka ingiriiska,<br>• Awoodaan ku hadalka afka ingiriiska<br>• Adeegsanayaan | Ardeydu waa in ay:<br>• Ku doodi karaan kuna gudbin karaan luuqadda ingiriiska fekradaha ay doonayaan inay gudbiyaan<br><br>• Ka baxaan fasalka 12aad ee dugsiga |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | • Awoodaan iney akhriyaan kana fal celiyaan tilmaamaha iyo weydiimaha.<br>• Isku aaddinayaan ereyo iyo weedho gaagaban ee la xiriira dhammaan inta sare lagu xusay.<br>• Yaqaanaan ereyada looga baahan yahay deegaankooda<br>• Si sax ah ugu dhawaaqaan uguna hadlayaan ereyada afka Ingiriiska.<br><br>• Dhisayaan weedho gaagaaban<br>• Leeyihiin dhaqan wax akhris oo joogta ah | oo ay fahmayaan tilmaamaha, sharaxaadaha, iyo sheekooyinka fudud ee ku qoran afka ingiriisiga.<br>• Awoodaan akhrinta qeybo (tuducyo) la xiriira qodobbo barasho kala duwan<br>• Adeegsanayaa af-sayniseed iyo xisaabeed fudud si ay ugu diyaar noqdaan in ingiriiska uu u noqdo afka waxbarashada fasalka 1aad ee dusiga sare.<br>• Awoodaan qoridda faqrooyin (tuducyo) gaagaaban oo iyaga iyo deegaankooda ka hadlaya oo leh hingaad, naxwe iyo erey bixin sax ah<br>• Kasbadeen oo ay leeyihiin xirfadaha qoraalka, akhriska, dhageysiga iyo ku hadalka afka ingiriiska iyaga oo adeegsanaya weedho iyo sheekooyin gaagaaban.<br>• Si sax ah u adeegsanayaan astamaynta | sare iyaga oo si fiican ugu hadlaya afka ingiriska<br><br>• Awoodaan la sheekeysiga qof luqadda ingiriiska ay u tahay luqadda kowaad.<br>• Fahmayaan wararka raadiyaha iyohadal jeedinta ku baxa afka ingiriiska.<br>• Gaaraan heer uu luqaddan wax ku akhriyaan oo ay ku sameeyaan cilmi baaris iyaga oo tixraacaya buugaagta ama internetka,<br>• Curinayaan qoraallo leh astaameyn iyo naxwe sax ah.<br>• Awoodi karaan in ay ka faalloodaan qoraallo ay akhriyeen.<br>• Leeyihiin dhaqan wax akhris oo joogta ah. |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | | qoraalka, iyo eray bixinta maaddooyinka<br>• Leeyihiin dhaqan wax akhris oo joogta ah | |
| **Afka-Carabiga** | Ardeyduwaxa ay:<br><br>• Awoodaan iney fahmaan, qoraan si sax ahna ugu dhawaaqaan xuruufaha afka carabiga.<br>• Ku hadlaan kana jawaabaan salaamaha, weeraha gaagaaban ee ku saabsan iyaga, qoyska, dugsiga, deegaankoodaa,<br>• Akhrinayaan kana falcelinayaan tilmaamaha iyo weydiimaha.<br>• Isku aaddinayaan ereyo iyo weero gaagaaban ee la xiriira dhammaan inta aan kor ku soo sheegnay<br>• Si sax ah ugu dhawaaqayaan uguna hadlayaan ereyada afka carabiga ee looga baahan yahay heerkan<br>• Dhisayaan weedho gaagaaban. | Ardeydu waxa uu:<br><br>• Barteen akhris – qoraalka asaaska u ah luqadda carabiga,<br>• Awoodaan ku hadalka, sheegidda iyo fahmidda tilmaamaha iyo weydiimaha, sharaxaada, iyo sheekooyin fudud.<br>• Akhrinayaan faqrooyin (tuducyo) la xiriira qodobbo barasho kala duwan.<br>• Adeegsanayaan luqad sayniseed iyo xisaabeed fudud si ay ugu diyaar noqdaan in afka carabiga uu noqdo luqadda waxbarashada fasalka 1aad ee dugsiga sare.<br>• Qorayaan tuducdyo gaagaaban oo iyaga iyo deegaankooda ka hadlaya oo leh hingaad, naxwe iyo ereybixin sax ah<br>• Kasbaday oo uu | Ardeydu waxa ay:<br><br>• Ka baxayaan fasalka 12aad ee dugsiga sare iyaga oo si fiican ugu hadlaya afka Carabiga oo la sheekeysan kara qof luqadda Carabiga ay u tahay luqadda koowaad.<br>• Fahmayaan wararka raadiyaha, iyo hadal- jeedinta ku baxa afka carabiga.<br>• Gaarayaan heer ay luqadda wax ku akhriyaan oo ay ku sameeyaan cilmi baaris iyaga oo tixraacaya buugaagta ama internetka,<br>• Curinayaan qoraallo sax ah naxwi ahaan.<br>• Ka faaloonayaan qoraallo ay akhriyeen<br>• Leeyihiin dhaqan wax akhris oo joogta ah.<br>• |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | • Leeyihiin dhaqan wax akhris oo joogta ah.<br>• Yaqaanaan hababka qoridda farta qurxan.<br>• karaan akhrinta ereyada carab jalqiska, fahmayaanna halxiraalayaasha fudud ee ku saleysan dhaqanka. | leeyahay xirfadaha dhegaysiga, akhriska, qoraalka iyo ku hadalka Afka caribiga,<br>• Akhrinayaan, qorayaanna weedho iyo sheekooyin gaagaaban.<br>• Si sax ah u adegsanayaan astaamaynta qoraalka.<br>• Adeegsanayaan eray bixinta maaddooyinka cilmiga.<br>• Leeyihiin dhaqan wax akhris oo joogta ah.<br>• Yaqaanaan ereyada isku-dhiggidda kala dhihidda ah. | |

## 9.2. Sayniska

Saynisku waa maaddo guud oo ay dadku ku baaraan maatarka - noole iyo manoole, tamarta, iyo isla falgalka ka dhaxeeya maatarka iyo tamarta. Waa aqoonta ku saabsan caalamka dabiiciga ah ee caawiya in uu si macne leh wax ugu kordhiyo horumarka bulshada, deegaanka iyo tiknoloojiyadda.
Waxa uu nagu caawinayaa baarista ifafaalayaasha dabiiciga ah, si ay u cadaato mala'awaalo loona awoodo in la hubiyo sharaxaado, cabbirro, aragtiyo iyo tijaabooyin si loo gaaro go'aan sax ah oo lagu dhiso gebegebo dhab ah oo ku saabsan degaankeenaa iyo dunida naga baxsan.

**Tuse 5: Mirodhalka laga filanayo Sayniska**

| **Dugsi hoose**<br>Dhammaadka heerkani qodobbadan waaweyn ee soo socda ayaa la filayaa in la gaaro | **Dugsi dhexe**<br>Dhammaadka heerkani qodobbadan waaweyn ee soo socda ayaa la filayaa in la gaaro |
|---|---|
| Ardeydu waxa ay:<br>• Kasbadeen oo ay isticmaalaan dhaqanno caafimaad iyo in ay wax ka weydiiyaan naftooda iyo deegaankooda.<br>• Fahamsan yihiin farqiga noole iyo manoole,<br>• Isbar bardhigayaan oo ay kala saarayaan xayawaannada iyo dhirta degaanka | Ardeydu waxa ay:<br>• Ka dhisan yihiin aqoonta iyo fahamka fikradaha nolosha, culuumta dabiiciga ah, culuumta dhulka iyo hawada sare. Ku dabaqayaa fahamkani soo bandhigidda, isdhexgelinta iyo kordhinta aqoontiisa.<br>• Sharaxayaa astaamaha muuqda ee : hawada, biyaha iyo carrada, kala saaraa sida ay (isula falgalaan) hawada, biyaha iyo carrada.<br>• Sharaxayaan sababta hawada, biyaha iyo carrada ay muhiim ugu yihiin noolaha. |

| | |
|---|---|
| Saynis ahaan u fiiriya walxaha laga helo deegaannada agagaarka dugsiga iyo guryaha garanayaana raadka ay ku leeyihiin noloshiisa.<br><br>• Saynis ahaan ayey wax u cabbirayaan waxaana ay sameeyaan saadaalin heerkooda ah.<br><br>• Fahamsan yihiin micnaha iyo muhiimadda nadaafaddu u leedahay caafimadka.<br><br>• Yaqaanaan tallaabooyinka badbaadinta iyo nadaafadda.<br><br>• Sharxayaan sida loo yareeyo cudurrada la kala qaado waxaana uu aqoonsan yahay faydhowrka asaasiga ah iyo horumarinta howlaha caafimaad ee guriga, dugsiga, bulshada sida gacmo dhaqashada xilliga loo baahan yahay, qashin qubidda, biyo nadiifinta, iwm.<br><br>• Hormarinayaan isdhexgalka, xirfadaha wada shaqeynta iyo in uu fuliyaa u kuurgelidda iyo wax ka sheegidda | • Awoodaan Cabiridda cimilo-gooreedka heerkul ahaan, dhedo ahaan, daruuraha, xawaaraha iyo jihada dabaysha.<br><br>• Qiimeeyaan saameynta cimilo-gooreedku ku leeyahay noole iyo ma-noole.<br><br>• Sharxayaan qaabdhismeedka iyo shaqooyinka asaasiga ah ee habdhisyada neefsashada, dheefshiidka, dhiigga, qalfoofka, muruqyada, qashinsaarka, dareenka iyo Taranka, iyo sida habdhisyada jirku ay isugu xiran yihiin.<br><br>• Garanayaan qaybaha laga beddeli karo tijaabo.<br><br>• Qiimeeyaan wax ku oolnimada tijaabooyinka, sharxaa tallaabooyinka lagu dejiyo tijaabo, soo bandhigaa habsami u adeegsiga qalabka tijaabada si uu u baaro noolaha aan lagu arki karin isha caadiga ah oo keliya.<br><br>• U adeegsadaan qalabka sida ugu habboon si aan naftooda iyo dadka kale khatar u gelin, fahamsan yihiin sida noolayaashu ay u qabatimeen deegaanadooda.<br><br>• Saafid ku sameeyaan sida ay cunno ahaan, bulsho ahaan isugu xiran yihiin noolayaasha yar yar, dadka, bulshooyinka, iyo habdhiska degaanka.<br><br>• Sharxayaan faa'iidada caafimaadka qofka, jirka, dareenka maskaxda u leeyihiin ka qayb qaadashada waxqabadka jirka.<br><br>• Baaris ku sameeyaan xiriirka ka dhexeeya nafaqada iyo waxqabadka jirka. |

| | |
|---|---|
| deegaanka isaga ku xeeran.<br><br>• Iska ilaaliyaan waxyaabaha khatarta ah sida xayawaannada dadka cuna, kuwa qaniina, waxyaabaha lagu sumoobo, khatarta hubka noocyadiisa kala duwan sida miinooyinka, qoryaha, bistooladaha, mindiyaha iyo sida khatarta korontada la isaga ilaaliyo.<br>• Isbarbardhigayaan xayawaanada door joogta iyo daba joogta ah.d | • Garanayaan ilaha ilayska iyo jabaqda, sharxaan astaamaha ilayska, jabaqda, fahmaa sida xoogagga kala duwan ay u saamayn karaan dhaqdhaqaaqyada walxaha.<br><br>• Sheegaan waxtarka makaanikeed ee makiinadaha fudud, qiimeeyaan habab kala duwan oo lagu dhallin karo danabyo koronto oo sahlan, hubiyaanna meelaha ay korontadu marto isaga oo isticmaalaya mareeg qulqul danab toosan, tusiyaa in korontada loo beddeli karo ilays, kul, jabaq, dhaqaaq, iyo saamaynta birlabta.<br><br>• kala soocaan tamarta danabka ee la cusboonaysiin karo iyo kuwa aan la cusboonaysiin karin<br><br>• Sharxayaan astaamaha dhaqdhaqaayada walxaha ku dhex jira hab qorraxeedkeena.<br><br>• Garanayaan abla- ablaynta dhirta iyo xayawaannada, iyo habdhiska dhirta iyo shaqooyinka ay qabtaan<br><br>• Kala saaraan maatarka iyo wejiyadiisa<br><br>• Adeegsadaan tusaha kalgalka curiyeyaasha<br><br>• Sharxaan noocyada falgallada kimikaad<br><br>• Sharxaan cudurrada faafa iyo ka hortagooda |

### 9.3. Xisaabta

- Xisaabtu waa sababeyn iyo waxqabad hal-abuureed ee ku shaqeeya malo'awaal iyo go’aan guud si loo aqoonsado, sharxo, loona dabaqo qaabdhismeedyo iyo xiriiro.
- Xisaabta oo asalkeedu yahay summado waxa ay bixinaysaa hab isgaarsiin awood badan oo leh qeexid kooban oo go’an.
- Fikiradda xisaabta waxa ay isi soo dhalan rogaysay dhaqano kala duwan kumanaan sano walina waxa ay ku jirtaa hourmar joogta ah.
- Tiknolojiyada tirooyinka ayaa fududeynaya fidista fakiridda, waxa ay na siinayaan furaha albaabo loo maro sahanka xisaabta iyo casriyeynteeda.
- Xisaabtu waxa ay kaga lamaanan tahay maaddooyinka kale, horumarka tiknolojiyada iyo sayniska meelo badan.
- Xisaabtu waa maaddo si dhab ah loo dabaqayo barashadeeda ka sokowna waa muhiim, waayo waxa ay ku siineysaa fursado hourmar iyo xiisogelin.

**Tusaha 6: Mirodhalka laga filaayo Xisaabta**

| **Dugsi hoose** Dhammaadka heerkani qodobbadan waaweyn ee soo socda ayaa la filayaa in la gaaro | **Dugsi dhexe** Dhammaadka heerkani qodobbadan waaweyn ee soo socda ayaa la filayaa in la gaaro | **Dugsi sare** Dhammaadka heerkani qodobbadan waaweyn ee soo socda ayaa la filayaa in la gaaro |
|---|---|---|
| Ardeydu waxa ay:<br>• Si kalsooni ku jirto u furfuraan mas’alooyin la xiriira tirooyinka idil<br>• Sameeyaan xisaabin sax ah iyaga oo adeegsanaya xisaabfallada isugeynta, kalagoynta iskudhufashada iyo isuqaybinta.<br>• Awoodaan in | Ardeydu waxa ay:<br>• Ka kobacsan yihiin xirfadaha maskaxeed ee tirooyinka idil ilaa malaayiin, qiime rugeed, labajibaar iyo xidid labajibbaar, xidid saddexjibbaar tirooyinka ilaa 3 god,<br>• Sameeynayaan xisaabinta la xiriirta jibbaarrada iyo loogaaridim, ururrada, isutagga, dhextaalka iyo hormo ururrada,qaabdhismeedyada tirooyinka, raadinta bedka sallaxa, goobooyinka, afar-geesleyaasha, iyo qaabab iskudhafan, mas’alooyin la xiriira wareegga, bedka iyo | Ardaydu waxa ay:<br>• Hanteen furfurista tirooyinka, Aljabra, Joomitiri, xisaab maaliyadeed ku baahsan xaaladaha dahsoon iyo kuwa dhabta ah ee nolasha.<br>• Si kalsooni ku dheehan tahay u soo bandhigayaan cilmiga xisaabta ee lagu soo qaatay muqararka.<br>• Leeyihiin xirfado camali ah oo la |

| | | |
|---|---|---|
| uu xalliyo masalooyin kala duwan oo ay ka mid yihiin qiime-rugeedka tiro idil, jajab fudud iyo jajab tobanle fudud<br>• Kala saarayaan qaababka iyo astaamahooda,<br>• Si sax ah wax u sawiraan iyaga oo adeegsanaya qalabka cabbiraadda.<br>• Hormariyaan sababayn ku dhisan xisaabta.<br>• Sameeyaan cabbiraadda waqtiga, lacagta, bedka, wareegga,<br>• Aqoonsadaan astaamo joometari oo fudud oo ay ku jiraan xariiqo barbarro ah, qotome, iyo xagal.<br>• Sameeyaan tarjumidda tuseyaal iyo garaafyo.<br>• Ku daris | halbeegyada,<br>• Adeegsadaan xeerarka bedka, mugga, iyo qaadka adkeyaasha,<br>• Furfurraan mas'alooyin ay ku jiraan lacagta, qiimaha, qiimo dhimis iyo qiimo kordhin boqoleey, biilasha, xawaare, fogaan, hawl, waqti, iyo celceliska xawaaraha.<br>• Yaqaanaan xirfado la xiriira nolol maalmeedka oo ay ku jiraan jajabyo, tobanle, boqoley, kala hormarinta xisaabfallada,<br>• Furfuraan mas'looyin ay ku jiraan joometari: saddex xagallo isu eg, isku sargo'an, dhisidda saddexagallada, ku dhisidda saddexagallo gudaha iyo dibadda goobo.<br>• Adeegsadaan aragtida baaytogariska.<br>• Kala saaraan tuseyaal, iyo garaafyo.<br>• Furfuraan mas'alooyin celcelis, badidhace, dhexfur xog la siiyey.<br>• Sawiraan garaaf laydiyeed iyo mid goobo.<br>• Furfuraanmas'alooyin itimaal oo asaasi ah, algebra, is-le'egyo toosan iyo isle'egyo wada jira, iyo kuwo saabley ah.<br>• Yaqaanaan xisaabta faa'iidada iyo qasaaraha, saamiwadaagga iyo doorsoonka ( transformation) | xiriira cabbiraadda, iyo furfurista mas'alooyin ku saabsan fansaarka, joomitiri iyo kalkulaas, iyo tiroooyinka kakan<br>• Leeyihiin xirfado baariseed ku saabsan xallinta mas'looyinka la xiriira nolol maalmeedka iyaga oo adeegsanaya habab badan oo ah xallinta mas'looyinka.<br>• Leeyihiin awood cilmi baariseed, xirfado fakirid iyo in uu si sax ah wax u taxliiliyaan kuwaasi oo la xiriira itimaalka iyo istaatistikiska<br>• Kasbadeen aragtiyo u saamaxaya in ay wax casriyeeyaan oo ay hal-abuuraan kaas oo waxtar u leh bulshada.<br>• Ka helaan barashada xisaabta iyo in ay ku guda jiraan nolol waxbarasho oo joogta ah.<br>• |

## 9.4. Cilmiga Bulshada

- Cilmiga bulshada waa duruus baahsan oo ka kooban maaddooyinka taariikhda, jugraafiga, Wadaniyadda iyo xirfad-nololeed, taas oo ka kaalmeyneysa ardeydu in uu ku noolaado, bartana deegaan kala duwan kuwaasi oo ay ka mid yihiin qoyska, guriga, dugsiga iyo bulshada sida ay u dhan tahay.
- Cilmiga bulshada waxa uu si weyn ugu kaalmeeyaa carruurta in ay fahmaan oo ay ogaadaan in ay ku tiirsan yihiin deegaankooda taasi oo saameyn ku leh noolashooda. Waxa kaloo ay dhiirigelineysaa xog-ogaalnimo balaaran in ay dunida u lahaadaan, ku caawisaa kobcinta xirfaddooda, awooddooda iyo fakir toosan oo ay ku soo bandhigaan nolol maalmeedkooda oo ay lahaadaan hal abuur.

**Tusaha 7: Mirodhalka Maaddada Cilmiga Bulshada**

| **Dugsiga hoose**<br>Dhammaadka heerkani ardeyda waxaa laga filayaa in ay gaaraan guulahan soo socda: | **Dugsiga dhexe**<br>Dhammaadka heerkani ardeyda waxaa laga filayaa in ay gaaraan guulahan soo socda: |
|---|---|
| **Ardaydu waxa ay:**<br>• Awoodaan horumarinta caadooyinka wanaagsan, la xiriiridda bulshada inteeda kale, tilmaan ka bixinta degaanka ku xeeran, jacaylka dhaqammada suubban iyo qiyamka ummaddu wada leedahay taasoo u ah hanti ay ku xusuustaan waalidiintooda hore.<br>• Yaqaanaan taariikhdii Nebi Muxamed (csw),<br>• Tilmaamaan dawrka ay ku leeyihiin qoyskooda iyo deriskooda.<br>• Fahamsan yihiin arrimaha qoyska dhexdiisa ah.<br>• Fahamsan yihiin khilaafaadka iyo waxyaabaha keena.<br>• Ka qeyb qaataan xallinta khilaafaadka ardeyda filkiisa ah iyo saaxiibbadiis | **Aradaydu waxa ay :**<br>• Dhowraan nadaafaddooda qofeed iyo tan bulshada ay ku dhex nool yihiin<br>• Ku tababaran yihiin laylinta fayadhawrka bulshada,<br>• Xiriir wadareed la sameyaan dadka kale ee ay la nool yihiin, taas oo lala xiriirinaayo deegaankiisa, lana barbardhigaayo deegaannada kale sida degmooyinka iyo goballada kale<br>• Jecel yihiin qarannimada.<br>• Leeyihiin xirfadaha xallinta khilaafaadka dhexmara kooxaha fac wadaaga ay yihiin , una dhexgelaan si wax ku ool ah saaxibbadooda, qoyska iyo |

| | |
|---|---|
| kuna dhammeeyaan si nabad ah.<br>• Awoodaan in si fudud u dhexgali karaan saaxibbadiis iyo bulshada inteeda kale.<br>• Ixtiraamaan bulshada ay la nool yihiin gaar ahaan waalidiinta,macallimiinta,waayeelka, deriska iyoareyda ay wax la bartaan.<br>• Ilaaliyaan hantida qoyska, dugsiga, bulshada islamarkaana ay dhawraan deegaankiisa.<br>• Tilmaamaan sheegi karaanna dawrka ay leeyihiin hogaamiyaasha bulshada<br>• Sheegi karaan geesiyaashii u soo halgamay Somaaliya iyo guulihii ay soo hooyeen.<br>• Tilmaan ka bixiyaan xudduudaha, dhulka, biyaha, iyo kheyraadka Eebbe ku maneystay dalkeenna.<br>• Yaqaanaan akhrinta iyo tarjumidda khariidadaha aasaasiga ah<br>• Yaqaanaa waxtarka dhirta iyo hababka dhireynta. | bulshada inteeda kale.<br>• Ixtiraamaan dadka ay la nool yihiin iyo bulshada inteeda kale, dhowraanna hantida dadweynaha iyo tan gaarka ah.<br>• Yaqaanaan muhiimadda uu leeyahay qiyamka Islaamiga, dhaqanka suubban iyo taariikhda asxaabtii Nebi Muxamed (NNK).<br>• Awoodaan in ay gartaan waxtarka ay leedahay isku baraarujinta wadaniyadda iyo dawrka hoggaamineed ee hoggaamiyaasha dalka ay leeyihiin, iyo soo bandhigdida hoggaamiyeyaashii taariikhda ka sameeyay Islaamka iyo Afrika iyo guulihii ay soo hooyeen.<br>• Tixgeliyaan qiimaha uu leeyahay deegaanka iyo khataraha ku soo fool leh.<br>• Tilmaamaan xuduudaha, dhulka, biyaha, dhaqaalaha Eebbe ku maneystay dalkooda, wadamada Geeska Afrika, Bariga Afrika, dunida islaamka iyo caalamka kale.<br>• Garanayaan cimilada deegaannada kala duwan iyo saameynta ay ku leedahay kala duwanaanshaha dhaqanka.<br>• Yaqaanaan qaabdhismeedka dhulka sida buuraha, badaha iyo webiyada.<br>• Yaqaanaan akhrinta iyo tarjumidda khariidadaha. |

### 9.5. Daraasaadka Islaamka *(Barbaarinta Islaamiga)*

- Ujeeddada ugu weyn ee ay xambaarsan tahay maaddadani waa in ay sabab u noqoto dhisidda caqiido sax ah oo dhalineysa anshax suubban iyo in ay beerto qof huwan mabaadi'i assaasi ah oo adag, muujiyana dulqaad iyo la dhaqanka wanaagsan ee bulshada kale. Maaddadan waa inay siisaa ardeyda xaqiiq dhab ah iyo aqoon gaarsiinaysa barashada Allaah iyo cibaadadiisa, Nebiga (SCW) iyo ku dayashadiisa, sidaa oo kale aragtida islaamka ee ku aaddan abuurista adduunkan aan ku noolnahay iyo xaqiiqada nolosha aadanaha iyo meesha uu ku danbaynayo.

- Maaddaddan waxa ay ardeydu si weyn uga kororsan doonaan xumaanta qabyaaladda iyaga oo ka shidaal qaadanaya aafada ay ku reebtay ummaddeena.
- Daraasada Islaamku waa qeybta ugu muhiimsan manhajka dugsiyada, waxaana loo dejiyey in uu macallinka hago iyo in uu ku caawiyo bartaha in uu ku kobco akhlaaq iyo ruuxi ahaanba, taasoo ka dhigeysa in uu u koro qof masuul dheellitiran oo bisil waxtar ku leh bulshada dhexdeeda.
- Waxa jira fursado badan oo daraasaadka islaamiga ah loogu dhex dari karo maaddooyinka kale sida kobcinta anshaxa, akhlaaqda, ruuxa, oo si fiican loo dhexgelin karo dhisidda waxa la xiriira dareenka qofka, maskaxda iyo jirkaba.
- Inta aan kor ku soo sheegnay, barashada Islaamka marka loo eego manhajka dugsiga waa hiigsiga lagu horumarinaayo wacyigelinta nafta oo ah wax gaar ah oo leh awood aqooneed, faham iyo ku dhaqan. Taariikhda aadamiga waxaa la garwaaqsaday in diinta aan looga maarmin nolasha oo wax waliba oo la soo xiganaayana ayada ama xadiis lagu saleeyo. Soomaaliya islaamku waa aasaaska dhaqan aqooneedka, dawr weynna ku leh muuqaalka qaranka Soomaaliyeed mustqbalka sida uu u ekaanaayo.
- Maaddaddan waa inay siiso ardeyda aragti sax ah oo adag kuna aaddan mabaadi'da guud ee diinta islaamka, sida tiirarka islaamka, tiirarka iimaanka iyo ixsaanka.

- Manhajka maaddadani waxaa laf dhabar (saldhig) u ah kitaabka quraanka ah iyo sunnada Nabi Muxamed (SCW).

Tusaha 8 waxa uu tusinayaa mirodhalka barashada ee laga filaayo heer kasta oo la soo xusay in lagu gaaro. Mirodhalka laga filaayo waxbarashda waxa ay saldhig u noqoneysaa horumarinta maaddo kasta oo ka mid ah muqrararka waxbarashada asaasiga.

In labaro ardeydu waxa ka dhexeeyo asaga iyo waalidka

| Arday | Waalidka |
|---|---|
| Ixtiraam | Barbaarin wanaagsan |
| Qadarin | Naxariis |
| Ismaqal | Saaxiibtinimo |
| Ku dayasho wanaagsan | Tusaale wanaagsan |

**Tusaha 8: Mirodhalka laga filaayo Barbaarinta Islaamiga**

| **Dugsiga Hoose** Dhammaadka heerkani waxaa la gaari doono waxqabad kan hoose**.** | **Dugsiga Dhexe** Dhammaadka heerkani waxaa la qaban doonaa waxyaabaha soo socda. | **Dugsiga Sare** Dhamaadka heerkani waxaa la ogaan doonaa in la garto waxqabadkan hoose**.** |
|---|---|---|
| Ardeydu waxa ay:<br>• Yaqaanaan iskuna layliyaan qodabbada aasaasiga ee caqiidada islaamka, aqoon badanna u yeeshaan akhrinta & qorista qur'aanka iyo barashada siirada Nabiga (SCW) oo kooban.<br>• Yaqaanaan mabaadii'da guud ee islaamka sida: tiirarka islaamka iyo tiirarka iimaanka.<br>• Yihiin dad jecel Allaah, nabi Muxamed (SCW) iyo diinta islaamka, kuna | Ardaydu waxa ay:<br>• Aqoonsan yihiin Cajaa'ibta abuurka Allaah u abuuray makhluuqaadkiisa.<br>• Hormariyaan dareen masuuliyadi ku jirto ee maareynta deegaanka aynu ku nool nahay.<br>• Yaqaanaan dhibaatada ay leedahay qabyaaladda, kana fogaadaan ku dhaqankeeda.<br>• U gutaan shaqadooda si ikhlaas ah oo Allah ka cabsi ku jirto, baadigoobaanna xirfado habboon oo ay kaga hortagayaan caqabadaha dalka iyo dunidan ay ku nool yihiin taasoo ah in ay dhisaan awoodooda | Ardaydu waxa ay:<br>• Awoodaan in ay si buuxda u aqoonsadaan cajaa'ibta abuurka Allaah u abuuray makhluuqiisa (uunkiisa),<br>• Sheegaan qisooyinkii nabiyada sida ay ugu soo arooreen Qur'aanka kariimka ah.<br>• Hormariyaan dareen masuuliyadi ku jirto ee maareynta deegaanka aynu ku noolnahay.<br>• Aqoon weyn u leeyihiin dhibaatada ay leedahay qabyaaladda, ka fogaadaan ku dhaqankeeda, kana wacyi geliyaa bulshada inteeda kale.<br>• Aqoonsan yihiin in shaqada ay ka mid tahay cibaadada si ikhlaas ahna u gutaan. |

| | | |
|---|---|---|
| dhaqmo diinta islaamka.<br>• Ka horumarsan yihiin dhanka akhlaaqda islaamka, qiyamka iyo qiimaha ruuxiga, aadaabta, urursanaanta, dulqaadka, dabeecad wadaagga iyo ixtiraamka dadka ay la nool yihiin gaar ahaan dadka ka waaweyn.<br>• Fahamsan yihiin muhiimadda ay leedahay nadaafadda, nabadda, u adeegidda bulshada, u gargaaridda dadka dhibaateysan iyo kuwa baahida gaarka ah qaba.<br>• Yaqaanaan aasaasiyaadka diinta islaamka sida salaadda. | shakhsiyeed.<br>• Waa in uu yaqaanaa, fahmana Allah in uu yahay kan looga dambeeyo koonkaan, laguna dhaqmo diintiisa.<br>• Awoodaan in ay dib u fiiriyaan dhacdooyinkii taariikhda islaamka iyo horumarkii uu soo maray, soona dhaweeyaa dawrka horumarineed dhanka dhaqanka iyo xadaaradahii islaamka soo maray oo ay ugu horreeyaan , siirada Nabiga (SCW) iyo taariikhda afartii khaliif,<br>• Awoodaan in ay fahmaan waxqabadkii iyo isbeddelkii ay keeneen aqoonyahankii islaamka oo kooban<br>• Yaqaanaan caqiidada sunniga ah iskana ilaalin karaan afkaaraha kale ee diimeed ee qaldan.<br>• Yaqaanaan gudanayaanna waajibaadka diinigi ah. | • Yaqaanaan xirfad habboon oo ka hortagi karta caqabadaha dalka iyo dunida heysta maanta, taasoo lagu dadaalaayo horumarinta shaqsi waxtarkiisu habboon yahay kana dhawrsoon caddaalad darada iyo qabyaaladda.<br>• fahamsan yihiin, awoodda ALLAH SW Awoodaan in ay dib u eegaan dhacdooyinka taariikheed ee islaamka soo maray iyo guulihii waaweynaa ee uu soo hooyay sida ilbaxnimadii iyo dhaqamadii aqooneed ee u gaarka ahaa islaamka, taasoo la rabo in la garto waxqabadkii aqoonyahankii islaamka, siirada asxaabihii iyo hoggaamiyeyaasha islaamka iyo isbedellada ay ku soo kordhiyeen dunida aan ku nool nahay.<br>• |

### 9.6. . Waxbarashada Barbaarinta jirka ka/ *Barbaarinta jirka*

- Waxbarashada Barbaarinta jirka ka waxa ay ka kooban tahay jirka, dareenka iyo aragtida bulshada ay ka qabto nolasha qofka. Ciyaaruhu waxa ay ka xoojiyaan ardeyda dhanka la xiriira fayo qabka, aqoonta, xirfadaha iyo baratanka si loogu noolaado firfircooni iyo nashaad joogta ah oo ku dhisan caafimaad. Sido oo kale ardaydu way aqoonsan yihiin waxtarka Barbaarinta jirka iyo goobaha kale ee jimicsi in ay kor u qaadaan caafimaadka qofka iyo bulshadaba. Heerka dugsiga hoose ardeydu waa in lagu horumariyaa arrimo aasaasi ah oo kor u qaadi kara firfircoonidooda, loo fidiyaa heerkani fursado uu kaga qeyb qaato hawlaha Barbaarinta jirka ka, isdhexgalka, la kordhiyaa dhaqdhaqaaqa jirkoodaa horumarinaayo iyaga oo adeegsanaayo Barbaarinta jirka gudaha iyo kuwa dibadda iyo layliyada iyo hawlaha la xiriira Barbaarinta jirka kala duwan iwm.
- Barashada Barbaarinta jirka jirka waxaa xoog lagu saaraa xiriirka adag ee ka dhaxeeya cilmi nafsiga, habdhiska jirka guud ahaan iyo xaaladaha la xiriira cilmiga bulshada.
- Xiiso badan waxaa leh ardeyga jirkiisu nashaadsan yahay in uu si fiican ugu raaxeysto Barbaarinta jirka , waxa ayna ka qeyb qaadataa garsooridda Barbaarinta jirka ama kororsiimaha aqoontiisa guud, Barbaarinta jirka jirka aadamiga ayey koriyaan.
- Barashada Barbaarinta jirka jirka waxa ay u yeelaan aasaas adag, ardeydu rabo in ay sii wataan daraasad dheeri ah oo ku lug leh dhaqdhaqaqa aadamiga taasoo la xiriirta maareynta horumarinta Barbaarinta jirka , siyaasadaha isboortiga iyo Barbaarinta jirka ka, warbaahinta Barbaarinta jirka iyo oroddada kala duwan iyo sida loo maareeyo.
- Waxaa kale oo muhiim ah in ardeydu loo fidiyo tababaro shaqsiyeed iyo casharo siin ku aadan saddexda heer: Hoose/dhexe/sare
- Waxaa kale oo muhiim ah in Barbaarinta jirka Barbaarinta jirka ka lagu daro kuwa ku saleysan dhaqanka islaamiga iyo kan Soomaalida ah.

**Tusaha 9: Mirodhalka laga filaayo Waxbarashada Barbaarinta jirka ka**

| **Dugsiga Hoose**<br>Dhammaadka heerkani waxaa la gaari doonaa waxqabad kan soo socda | **Dugsiga Dhexe**<br>Dhammaadka heerkani waxaa la gaari doonaa wax qabad kan soo socda | **Dugsiga Sare**<br>Dhamaadka heer kani waxaa la gaari doonaa waxqabadkan soo socda |
|---|---|---|
| Ardeydu waxa uu:<br>• Awoodaan horumarinta guud ahaan jirkiisa, isku dheelitirka, kor u qaadidda iyo isku duwida wada shaqaynta xubnaha jirka,<br>• Yihiin kuwo fayow jirkana ka dhisan.<br>• Garanayaan qiimaha iyo raaxada uu leeyahay sameynta layliga joogtada ah<br>• Caadeystay jir dhiska quman.<br>• Ardeyda baahida gaarka ah leh waxa ay yaqaanaan layliyo xaddidan ee ku beeri kara kalsooni uu ku sii wataan hawl ahooda ciyaareed. | Ardeydu waxa ay:<br>• Qabatimeen sameynta, caadeysiga layliyo joogta ah oo ay ka qeyb qaataan iyo qabsoomida hawlo badan ee ku aadan jir dhiska,<br>• Ogaadaan in horumarinta xirfadaha isbortiga ay la xiriirto tiro ciyaaro oo kala duwan.<br>• Awoodaan in ay adeegsadaan shuruucda Barbaarinta jirka<br>• Lahaadaan anshax wanaagsan oo gaarsiiya in ay qaban karaan ciyaar wanaagsan<br>• Muujiyaan wada shaqeyn kooxeed.<br>• Ardeyda baahida gaarka ah leh waxa ay barteen sida ay ku heli lahaayeen faai'idada ugu wanaagsan ee xaddideysa hawlahooda ciyaareed. | Ardeydu waxa ay:<br>• Sameyaan laylin joogta ah ee xiisa badan oo ka qeyb qaadanaayo horumarinta dhismaha jirkiisa.<br>• Kororsadeen waayo aragnimo ku aaddan ciyaar gaar ah, waxa ayna horumariyaan xirfado badan ee ku habboon dhaqdhaqaaqa isboortiga ay sameeyaan.<br>• Noqdeen dad ka qeyb qaata tartamada iyaga oo isku kalsoon, muujinaayana ciyaar wanaagsan iyo wadashaqeyn kooxeed. |

### 9.7. . Tiknolijiyada

- Maaddadaani waxay xoojineysaa ardeygu in uu isticmaalo tiknoolijiyada si uu u adeegsado erayo, sawiro iyo codadba.
- Waxa ay helayaan xirfado ku dhaweeya kala beddelashada macluumaadka kala duwan oo ay ku jirto adeegsiga e-mailada iyo aaladda internetka.
- Waxay kale oo awood u siineysaa tiknoolajiyada in ay ku xakameeyaan dhacdooyinka iyo qalabkaba.
- Waxa kale oo ay baranayaan sida loo ururiyo xogta, loo istcmaalo, loo bandhigo, loola wadaago dadka kale...

**Tusaha 10: Mirodhalka laga filaayo maaddada Teknolojiyada**

| **Dugsiga Dhexe**<br>Dhammaadka heerkani waxaa la filayaa ardeydu in uu soo hooyo guulaha hoos ku xusan. | **Dugsiga Sare**<br>Dhammaadka heerka waxbarshada dugsiga sare in uu ardeygu gaaro guulaha hoos ku xusan |
|---|---|
| Ardeydu waxa uu:<br>• Awoodaan in ay isticmaalaan qalabka computerka wax lagu geliyo waxna looga soo saarto (input/output devices), taas oo sahleysa in ay fahmaan isticmaalka qalabka tiknoolajiyada kala duwan iyaga oo si madax bannaani ku jirto ugu isticmaalayo.<br>• Si xeel dheer u adeegsadaan tiknoolajiyada iyo eray bixinadooda.<br>• Yaqaanaan isticmaalidda qalabka softwareka iyaga oo uga faa'ideysanaayo dhanka waxbarashada iyo xaaladaha bulshada, isticmaalidda tiknoolajiyada waxaa fududaanaya xiriirka isgaarsiinta in uu noqdo mid taaba gal ah., | Ardeydu waxa ay:<br>• Awoodaan in ay si fiican oo wax ku ool ah u adeegsadaan qalabka lagu geliyo lagalana soo baxo xogta,<br>• Farsameeyaan qalabka kumbiyuuterka soona bandhigaan habsami u adeegsiga tiknolojiyada iyo xogta,<br>• U isticmaalaan si masuuliyad ku jrto tiknoolijiyada iyo xogta taasoo waxbarshadooda kor u qaadeysa. Muujiyaan in ay ku beerto isdhexgal bulsho iyo dabeecad wanaag goorta ay isticmaalayaan tiknoolijiyada.<br>• Awoodaan in tiknolojiyada la heli karo ay u adeegsadaan xallinta mas'alooyinka, ku soo bandhigaan fikirkoodaa iyo sheekooyinkooda, u adeegsadaan tiknoolajiyadani xallinta mushkilladaha, wax isbaridda qofka, balaarinta hawlahooda waxbarasho iyo wax soo saarka qofka,<br>• Leeyihiin awood ay ku sameeyaan |

| | |
|---|---|
| | qiimeyn sax ah, munaasib ah, ku habboon, laguna qanci karo.<br>• Fahmaan dhibaatooyinka ay bulshada u keeni karto teknoolijada haddii loo isticmaalo si qaldan. |

**Maaddooyinka u gaarka ah waxbarasha Dugsiga sare**

### 9.8. Maaddada Taariikhda

- Daraasadda maaddada Taariikda waxa ay ka caawineysaa ardeyda in ay helaan aqoon xiriirta iyo in ay fahmaan taariikhdii hore ee Soomaliya soo martay iyo dhamaan adduunka, waxa ayna ku dhiiragalineysaa ardeyda in ay wax badan ka ogaadaan waxyaabihii hore.
- Baridda maaddada Taariikhda waxa ay ka kaalmeyneysaa ardeyda in ay kororsadaan aqoon ballaaran oo ku aadan taariikhdii hore ee Soomaaliya iyo kasbashada aqoon isku xiran ee dunida. Waxa ay gelineysaa ardeyda xiisa badan si ay wax uga ogaadaan dhacdooyinkii hore.
- Baridda taariikhda waxa ay awood u siineysaa ardeydu in ay baaraan weydiimo ku aadan sidii ay u heli lahaayeen xog badan oo la isku haleyn karo, una fakaraan si waaqici ah, cadeymo la qaadan karo ku saleeyeen doodoodaa, ka fogaadaan muranka iyo wixii la halmaala, go’aanadoodana ay noqdaan kuwo si fiican ay uga baaraan degeen.
- Taariikhdu waxa ay ka caawisaa ardeyda in ay fahmaan isku-dhafnaanta nolasha aadamiga, geedi socodka isbedelka kolba dhacaayo, kala duwanaanshaha ummadaha iyo xiriirka ka dhexeeya ee isku keeni karo, iskaashiga iyo ka hortagidda caqabadaha wakhtiga.

**Tusaha 11: Mirodhalka Maaddada Taariikhda**

| **Dugsiga sare**<br>**Dhammaadka heerkani mirodhalka ballaaran ee soo socdo ayaa la filayaa in la gaari doono** |
|---|
| Ardeydu waxa ay:<br>• Awoodaan in ay aqoonsadaan, xiiso gaar ahna siiyaan waxtarka barashada maaddada taariikhda ay u leedahay qaranka si loo halo fakar waadix u ah bartayaasha, isku xirnaanta, taxanaha taariikhda laga soo bilaabo waagii hore ila maantadan aynu joogno, sida nolosha dadku ay u qaabayso dalkooda, iyo sida Soomaaliya saameynta ugu laheyd uguna yeelan doonto dunida inteeda kale. |

| |
|---|
| Aqoon fiican u leeyihiin taariikhda Islaamka iyo tan Soomaaliya<br>• Gartaan oo fahmaan waxtarka ay leedahay barashada taariikhda dunida, dabciga ilbaxnimadii hore ee dunida soo maray, fidistii iyo burburkii boqortooyooyinka, astaamihii iyo qaabkii ay lahaayeen bulshadii hore, guulihii iyo guuldarraddii aadanaha soo maray.<br>• Awoodaan in ay kasbadaan aqoon, oo ay tusiyaan in ay ku faraxsan yihiin si fiicana u kala dhig-dhigaan habka dhaqan dhaqaale iyo ururada siyaasadeed ee bulshooyinka adduunka.<br>• Fahmayaan oo ay si xiiso ku jrto u eegayaan xuquuqda, sharafta iyo waajibaadka qofka iyo dadka kale si loo horumariyo bulsho ku dhisan cadaalad iyo nabadgeliyo.<br>• Fahmaan fikradaha taariikheed oo ay ka mid yihiin joogtayn iyo natiijada ka dhalata, isu-ekaansho, kala duwanaansho iyo muhimad-siin, iyo in kuwani loo adeegsado isku xiriirid, isbarbardhigid, lagu kala dhigdhigo arrimo, laguna qaabeeyo weydiimo taariikheed oo dhab ah.<br>• Sameyn karaan cilmi baaris taariikheed.<br>• Fahmaan hababka loo baaro (raad goobo) taariikhdii hore oo ay ka mid yihiin in la adeegsado daliil si loo sheego taariikh jirtay waxa lagu saleeyay iyo sida loo soo bandhigay wixii la soo dhaafay. |

### 9.9. Maaddada Juqraafiga

- Maaddo dabeecadeed iyo bulsheed ahaan, Cilmiga Juqraafiga waa barashada oogada dhulka, iyo aadamiga siyaabaha uu ugu nool yahay deegankiisa iyo sida uu u daryeelayo
- Dadku waxa ay ka kaalmeyneysaa helitaan aqoon dhab ah, xirfado, fakir toosan iyo qiimo si loo maareeyo gacan ku heynta kheyraadka dabiiciga ee buuxa dhulka aanu ku nool nahay.
- Juqraafiga sidoo kale wuxuu siiyaa ardeyda fursado ay ku (hamiyo) xiiseeyaan kuna fahmaan dunida aynu ku nool nahay, iyo xiriirka iyo isku xirnaanta ka dhexeyso bulshada kala duwan heer tuulo, degmo, gobol iyo caalamkaba.

**Tusaha 12: Mirodhalka laga filaayo maaddada Juqraafiga**

| **Dugsiga sare**<br>**Dhamaadaka heerkani mirodhalka balaaran ee soo socdo ayaa la filayaa in la gaari doono** |
|---|
| Ardeydu waxa ay:<br>• Awoodaan in ay soo bandhigaan xirfadaha kala duwan sida: Akhrinta, tarjumida iyo fasiraadda khariidadaha iyo xog badan oo ku saabsan maadada juqraafiga iyo macluumaadka kale ee la xiriira. |

| |
|---|
| • Fahamsan yihiin qaabdhismeedka dhulka, biyaha iyo gibilka inaga sarreeya sida: Atamasfiir, bayasfiie, haydrosfiir iyo lidosfiir.<br>• Xiiseeyaan muhiimadda uu deegaanku leeyahay, dhawristiisa iyo in ay ku tababartaan maareynta khayraadka dabiiciga oo joogta ah si looga faa'ideysto kheyraadka iyo quruxda uu huwan yahay.<br>• soo bandhigi karaan faham la xiriira goobaha degaaneed, goboleed, daleed, caalami, iyo dunida oo idil, marka loo eego dhaqaale qaybinta iyo waxqabadyada bulsheed, fahmaanna isku tiirsanaanta ka dhexeysa dalalka dhinaca arimaha deegaanka, dhaqaalaha , arimaha bulshada iyo tiknoolajiyada si loo helo horumar taaba qaada oo joogta ah.<br>• Aqoon u leeyihiin cimilooyinka kala duwan ee dunida iyo saamayntooda.<br>• Aqoon fiican u leeyihiin Juqraafiga Soomaaliya.<br>dSameyn karaan tijaabooyin la xiriira kala saaridda ciidda qeybaheeda iyo faa'iidada ay la gaar tahay. |

### 9.10. Maaddada Kimistiriga

Barashada maadadan waxa ay ardeyda u suurtogelineysaa in ay dhisaan heemaal ay ku soo bandhigaan, kuna saadaaliyaan fahamka astaamaha maatarka iyo dhammaan qaababkiisa kala duwan iyo isbedellada ku dhaca.

**Tusaha 13: Mirodhalka laga filaayo maaddada Kimistiiriga**

| **Dugsiga sare**<br>**Dhammaadka heerkani mirodhlka ballaaran ee soo socdo ayaa la filayaa in la gaari doono** |
|---|
| Ardeydu waxa ay:<br>• Yaqaanaan haalojiinis, al-kaaliyada birta, biraha gudban, neefta wehsatada ah iyo curiyeyaasha kalaguurka si ay u sharxaan qaabdhismeedka tusaha curiyeyaasha marka loo eego tirada atomka, astaamaha kiimikeed ee cureyeyaasha, iyo in la hormariyo fahamka qabdhismeedka atamka, iyo qaabka ay ku sameysmaan dabarrada kiimikaad, moolka, garaam-atamada, graam-malakuyuulka.<br>• Sawiraan jaantuska xeyndaabka elektaroonada dibadda.<br>• Sharaxaan milanka iyo milmidda<br>• Leeyihiin xirfadaha iyo farsamada agabka, tijaabooyinka, ururinta natiijoyinka si cad loo fahmi karo.<br>• Awoodaan sameynta shaxda tijaaboyinka iyo milanka.<br>• Sharxaan dhibaatooyinka dikhowga (wasaqeynta) deegaanka sida salfar dayoksaydhka, kaarboonka laba oksaydh.<br>• Tusaale ka bixiyaan musiiboooyinka<br>• Fahamaan saameynta roobka aysidka leh, oo sharxaan in salfar laba |

oksaydhka hawada gasha ay la falgaleyso biyaha si ay u sameyso roob aysid ah, kana bixiyaa tusaalooyin raadadka waxyeellada ee uu roobka aysiidhku ku leeyahay dhismooyinka, carrada, dhirta iyo nolosha xayawaanka

- Sharxaan daxaleysiga, sababaha keena iyo ka hortaggeeda – Tusaale, sharaxaan in dahaar dusha ka ilaaliyo loo sameeyo biraha si looga hortago waxyaabaha keeni karo 'googo'a iyo daxalka sida ku dahaaridda bacda, saliidinta iwm
- Yaqaanaan kiimikada orgaanikada ah, Xeerarka neefaha, Danabsoocidda, Ogsidheyn iyo yareyn, falgallada (noocyada, dhaqsaha, dheellitiranka)
- Kala gartaan ururka 5aad iyo ururka 6aad ee tusaha falgalka curriyeyaasha
- Qeexaan oo kala saaraan Aysidhada, Baysyada, iyo Cusbooyinka.
- Horumariyaana fahamka isbedellada" enthalpy" [taas oo ay ka mid tahay in talbiyada dabbarada, cabbiraadda iyo xisaabinta elektroonnada ugu koreeya isbedellada enthalpy]
- Sawiraan jaantus ku tusinaya sida elektaroonnada ugu koreeya atammada u sameeyaan dabarro elektaroon wadaag ah.
- Sawiraan jaantus ku tusinayo qaababka ay laba curiye u sameeyaan molekiyuul
- Sharaxaan iyada oo la fiirinayo milmidda iyo curiyeyaasha muhimka ah, sababta ay cusbooyinka ammooniyam iyo kaaliyam [Potassium], naytaraytyada, fosfeydyada ay lagama maarmaanka ugu yihiin sameyta bacrimiyeyaasha
- Muujiyaan farsamooyinka ku habboon ee badbaadada iyo adeegsiga saxda ah ee qalabka.
- Tusaan sida xogta loo qiyaaso, keydiyo, loona bandhigo.
- Muujiyaan awood ay ku dhisaan, soo bandhigaan, saafaan tijaabada mitimiska[Titration] oo ay ku jiraan qaababka aasaasiga, milannada caadiga ah [standard soultion], xariiqda mitimiska iyo tuseyaal ku habboon.
- Tusaallooyin ka bixiyaan dhibaatooyinka dikhowga saliidda iyo dhuxusha sharaxaanna helitaankooda.
- Sheegaan waxa uu yahay monomer, polymer iyo ploymerimization
- Fahmaan xeerarka neefaha oo ay dejiyeen Boyle,Charles,Dalton, Graham iyo in ay xaliyaan mas'alooyinka la xiriira xeerarkaas.
- Tusiyaan nambarrada ogsidheynta ee curiyeyaasha ku jira iskudhisyada kala duwan iyo marka ay yihiin wajiga curiyanimada
- Sheegaan qaar ka mid ah astamaha guud ee iskudhisyada orgaanikada ah, magacaabidooda, qeexaa qaar ka mid ah falgalladooda

### 9.11. Maaddada Bayolojiga

- Barashada Bayolojiga ardeyda waxa ay ku xiraysa dunida ay ku dhex nool yihiin iyo in ay muujiso in ay ardeyda baranayaan isku xirnaanshaha dhammaan qaababka nololeed ee dunida.
- Waxa ay ka caawinaysaa in ay ardaydu hormariyaan ka warqabidda fauna iyo flora ecosystemiska u gaarka ah Soomaliya.
- Waxaa kale oo ardaydu wax badan ka ogaanayaan caaafimaadkoodaa iyo arimaha Bayolojiga.

**Tusaha 14: Mirodhalka laga filaayo maaddada Bayolojiga**

| **Dugsiga sare**<br>**Dhamaadaka heerkani mirodhlka balaaran ee soo socdo ayaa la filayaa in la gaari doonaa** |
|---|
| Ardeydu waxa ay:<br><br>• Si kalsooni leh u baaraan una sahmiyaan ifafaalayaasha ku habboon nolosha, iyaga oo adeegsanaya xirfadaha: weydiinta iyo furfuridda Mas'alooyinka.<br>• U yeeshaan aragti fog, xirfad dhaliilid toosinayd iyo xirfado kale si loo garto, fahmo, dhiso loona adeegsado cilmiga nolosha.<br><br>• Isbarbardhigaan, kala duwaan, sameeyaan go'aanno sax ah oo ku saabsan baaritaannada si loo garto micnaha cilmiyeed ee gunaanadka la gaaray.<br>• Isbarbardhigaan, kala duwaan, kalana gartaan kala dhimanaanshaha xogta la helay. Sidoo kale qiimeeyaan hab tijaabeedka.<br>• Aqoonsadaan xogta iyo tijaabooyinka waxtarka leh, kor u qaadaan fahamka walxaha nool iyo ma noolahaa, meertooyinka nafaqada iyo socodka tamarta ee deegaanka.<br>• Sheegaan kaarboohaydaraydka ay dhirtu ku sameystaan habka cunto sameynta (photosynthesis).<br>• Sameeyaan baaritanka tijaabooyinka footosintesiska.<br>• Soo gudbiyaan, sharxaa tijaabooyinka kale ee ku saabsan kelyaha, wadnaha iyo indhaha iyada oo la adeegsanayo jeebis.<br>• Qaabeeyaan (Heemaalaa) habdhisyada aadanaha iyo dhirta.<br>• Sharxaan habka qeybsanka unugga - koromsoomyada, maayoosiska iyo taranka unugyada jinsiga. DNA, hiddo sidayaasha, dhaxalka (Astaamaha la iska dhaxlo), cudurrada la iska dhaxlo, cudurrada faafa |

iyo habdhiska difaaca jirka,

- Sheegaan habdhiska neefsashada in uu yahay habka uu nooluhu (Dhirta iyo xayawaanka) ka helo tamarta ay u baahan yihiin, noolahaas oo jejebinaya kaarboohaydaraydka (Isticmaalaya oksijiinta) si loo soo saaro kaarboon laba oksaaydh iyo biyo ($CO_2$ & $H_2O$).
- Gartaan dabeecadda cilmiga sayniska iyo tiknoolajiyada iyo xiriirka ka dhexeeya sayniska iyo tiknoolajiyada. Sida oo kalena ay fahmaan saameynta uu cimliga sayniska iyo tiknoolajidu ku leeyihiin bulshada iyo deegaanka.
- Kala saafaan, qiimeeyaan kana warbixiyaan aragtiyada kala duwan iyo saameynta hababka bayooloojiga iyo tiknoolajiyaddu ku leeyihiin bulshooyinka deegaanka ku nool.
- Yeeshaan xirfadda hal-abuuridda (fakiridda), dhaliilidda si loo fahmo loonasharaxo dhismaha iyo faai'idada nolosha
- Sharxaan unugyada dhirta iyo xayawaanka iyo abla-ablaynta dhirta, xayawaanka iyo deegaanka

### 9.12. Maaddada Fisikiska

**Tusaha 15: Mirodhalka maaddada Fisikiska**

| **Dugsiga sare**<br>**Dhamaadaka heerkani mirodhalka ballaaran ee soo socdo ayaa la filayaa in la gaari doono** |
|---|
| Ardeydu waxa ay:<br>• Soo bandhigaan xirfado muhiim ah oo ku saabsan cabbiraadda, xisaabinta, iyo kala bedelidda halbeegyada sayniseed,<br>• Sameeyaan tijaabooyinka fisikiska.<br>• Dhisaan xiriirada iyo soo dheegidda gebegebooyin ku salaysan natiijooyinka ka soo baxa tijaabooyin.<br>• Si sax ah ugu gudbiyaan ra'yigooda habab munaasib ku ah (qaab jaantusyo, tuseyaal, garaafyo, iyo shax) iyaga oo isticmaalaya xeerar sayniseed iyo xisaabeed.<br>• Xakameeyaan makiinadaha la xiriira nolosha, astaamaha maatarka, korontada, , tamarta, kulka iyo heerkulka, hirarka iyo astaamaha ilayska, birlabta iyo gudbinta birlab-danabeedka iyo kaahfalka.<br>• Cabiri karaan culeyka, mugga, cufka iyo fogaanta.<br>• Isku xiraan oo dabbaqaan aqoontooda iyo xirfadahooda sayniseed si ay u korodho fahamkooda deegaanka iyo nolol maalmeedkooda.<br>• Muujiyaan aqoon, xirfado, aragtiyo iyo dareen habboon oo xoojiya si ay |

| |
|---|
| u gaaraan hammigooda waxbarashada dugsiga sare ka dib iyo in uu ku dabaqo aqoontiisa fisikiska nolosha shaqada ee dhabta. |

### 9.13. Maaddada Ganacsiga

Barashada maadadan waxa ay ardeyda u suurto gelineysaa in ay dhisaan heemaal ay ku soo bandhigaan, kuna saadaaliyaan fahamka ganacsiyada kala duwan ee dunida ka jira, gaar ahaan kan Soomaaliya. Ganacsigu waa lafdhabarka nolosha aadanaha wuxuuna noqday maanta mid si fudud loo gaarsiin karo dunida iyadoo aaney jirin caqabad xuduud iyo waqti.

Ardeydu waxey baranayaan waxyaabaha iyo waddooyinka casriga ah ee loo isticmaalo ganacsiga iyagoo ku saleynaya shareecada islaamka iyo hal abuur ku dhisan baahiyaha bulshada iyo deegaanka.

**Tusaha 16: Mirodhalka laga filaaayo Maaddada Ganacsiga**

| **Dugsiga sare**<br>**Dhamaadaka heerkani mirodhalka ballaaran ee soo socdo ayaa la filayaa in la gaari doono** |
|---|
| Ardeydu waxa ay:<br>• Taxliiliyaan waajibaadka bulsheed ee ganacsiga, iyo warbarashada marka loo eego arimaha la xiriira deegaanka, anshaxa, caafimaadka, badbaadada, iyo kala duwanaanta bulshada dhexdeeda iyo goobaha shaqada.<br>• Awood u leeyihiin in ay kasbadaan aqoonta asaasiga ah ee sharciyeed ee ku dhisan qiyamka islaamka, suuqeed, dhaqaaleed, iyo teknolojiyadeed ee la xiriirta ganacsiga si ay u noqdaan isticmaale, shaqaale iyo ganacsi abuure firfircoon.<br>• Hormariyaan xirfad waxbrasho joogta ah sida akhriska, xisaabinta, xiriirka, iyo go'aan qaadashada, kuwaasi oo hormarinaya wadiiqooyin shaqo furan iyo kalsooni ay ku qabi karaan goobaha shaqada taasi oo u baahan dib isu qalabayn joogta ah.<br>• Awood u yeeshaan in ay bartaan oo ay ficil ahaan u sameeyaan xirfadaha isdhexgalka, wadashaqaynta, si loo xoojiyo waxqabadka qofka ee goobaha shaqada iyo bulshada dhexdeeda iyo in la sameeeyo in ay si guul leh ugu gudbaan goobaha shaqada ama sii wadashada waxbarashadooda dugsiga sare ka dib. |

## 10. SIYAASADDA AFKA LAGU BIXINAAYO MANHAJKA

- Dugsiyada aasaasiga iyo xannaanada waxay wax ku baranayaan afka Soomaaliga.
- Afka Carabiga maadda ahaan waxaa lagu bilaabayaa fasalka 1-aad.
- Dugsiyada sare afka ay wax ku baranayaan waa: soomaaliga, carabiga ama ingriiska.
- Afka ingriisiga maadda ahaan waxaa laga bilaabayaa fasalka sadexaad ee dugsiga hoose.
- Tallaabooyinka aan laga maarmin in la qaado waa xoojinta afka wax lagu baranaayo dhammaan heerarka kala duwan.
- Istaraatiijiyo/xeelad kala guur ee cad ayaa loo sameeynayaa ardada muqarrarka fasalka 8aad dhiganeysa iyo kuwa fasalka 1aad ee dugsiga sare si loo xaqiijiyo dhibaato afeed in ardeydaasi aanay la kulmin.

## 11. HABABKA BARIDDA IYO BARASHADA

Bixinta manhajka fasalka dhexdiisa macallimiintu waxa ay adeegsadaan jidad kala duwan si loogu gudbiyo casharka dhammaan ardeyda. Iyadoo la eegayo arintaa macallimiintu waxa ay adeegsanayaan qaababka horumarin kara barashada sida:

1. **Barashada firfircoon- A**rdaydu waa inay si micne leh uga shaqeeyaan hawsha ku aadan mirodhalka waxbarashada.
2. **Barashada waayo-aragnimada -** Waa waxbarasho ka timid sahmin, helitaan, fal ama hawl gacmeed.
3. **Barashada horumarinta xirfadaha- Waa mid ku saleysan** helitaan xirfado baahsan, sida fakir hal-abuur iyo xallinta caqabadaha.

Manhaj qorayaashu waxa ay xaqiijinayaan in hababka barashadu ay ka muuqato tayada iyo mirodhalka waxbarasho, taas waxa ay ku xiran tahay xulashada, qorsheynta agabka waxbarasho ee loo adeegsado fulinta hababkani. Baruhu waa fududeeye, ee ma aha cilmi gudbiye sidaa darteed, waxaa ka badalaya habka uu macallinku yahay xuddunta baridda iyo barashada wuxuu u badalayaa habka ay ardeydu ka firfircoon yihiin macallinka. Macallimiintu waa in ay u adeegsadaan gudbinta habab kala duwan si ay u gaarsiiyaan dhammaan ardeyda iyadoo aan loo eegin awood yaraan. Ardeyda baahida gaarka ah leh iyo kuwa dhugga fiican leh waa la caawinayaa si ay ula socdaan heerkooda iyada oo aan la xannibin (Marka ay habboonaato waxa loo diraa hawl ku habboon oo xoogaa ka adag kuwa kale).

## 12. HABABKA QIIMEYNTA

Manhajka dugsiga waxaa uu u aqoonsan yahay in qiimeyntu ay ku lammaanan tahay hab socodka barista iyo barashada. Dowrka qiimeyntu waa in ay:

- bixisaa talo soo jeedin iyo warbixin ku saabsan horumarka ay ardeyda sameeyeen ee ka muuqda miradhalka waxbarasho si loogu adeegsado tilmaan marka la rabo in wax la saxo ama la caawiyo ardeyda.
- u suurtogelisaa ardeyda ogaanshaha maaddooyinka ay ku wanaagsan yihiin iyo kuwa ay ku liitaan, si kor loogu qaado waxbarashadooda.
- wargelisaa macalimiinta, maamulka dugsiga iyo wasaaradda horumarka guud ee ardeyda ka sameeyaan mirodhalkii barasho ee laga filaayey.

Qiimeyntu waxa ay diiradda saareysaa hubinta horumarka dhamaan ardeyda sida ay u gaareen mirodhalka ku qeexan muqararka la baraayo iyo qorshaha casharka. Gaar ahaan qiimeyntu waxa ay diiradda saareysaa qodobada soo socda:

1. Kasbashada bartaha ee aqoonta, xirfadaha iyo qiyamka.
2. Awoodda ay bartayaasha u leeyihiin in ay xirfadihii iyo aqoontii ay ka kasbadeen fasalka ku dabaqaan nolol maalmeedkooda..
3. In si cad loo arki karo in ardeyda ku dhacay isbadel aqooneed iyo habdhaqaneed

Baruhu waa inuu hubiyaa baahida khaaska u ah ardaydiisa, isaguna waa in la siiyaa agab iyo qiimeyn tayo leh ee uu ku ogaado heerka ardeyda. Manhajkii hore wuxuu ku saleysnaa habka uu macallinku yahay xuddunta qiimeynta, laakin manhajkan wuxuu awood siinayaa in ardeydu ka qeybqaataan qiimeyntooda sidaas darteed waxaa la qaatay hababka qiimeynta soo socota:

- Isqiimeynta shaqsiga: Ardeydu wey qiimeyn karaan heerka horumarka waxbarashadiisa. Tani waa in si aad ah loogu dhiiragaliyaa ardeyda dugsiyada dhexe iyo sare.
- Qiimeynta kooxda isku heerka ah: Ardeyda waxaa awood loo siinayaa in ay faalo ama talo ka bixiyaan horumarka barasho uu qof kale samaynayo. Hawl qabadkooda waxaa qiimeynaya ardeyda kale.
- Qiimeynta baraha: Baruhu waxa uu fududeynayaa qiimeynta joogtada ah iyo tan wadareed si dheelitiran.

Manhaj qoreyaasha goorta ay horumarinayaan muqararada maaddooyinka waa in ay hubiyaan qiimeynta bartilmaameedyada muhiimka ah iyo hababka ka turjumaya waxaa aan kor ku soo xusnay ee lagu qiimeynayo mirodhalka barashada iyo hanashooyinka. Qoreyaasha buugaagta maaddooyinka waxa laga filayaa in ay la yimaadaan siyaabo loogu samayn karo isqiimaynta, qiimaynta

kooxda isku heerka ah iyo qiimaynta macallinka waxqabad barasho ahaan, taas oo ah shuruud ay Wasaaradda waxbarasha ku oggolaanayso in buugtooda lagu dhigo dugsiyada.
Guddiga imtixaanaadka qaranka waxa ay lahaanayaan kaalinta ugu muhiimsan hawshaasi, waxa ayna qabanayaan hawlaha soo socda:

- Iney yihiin xarunta macluumaadka qiimeynta
- Qaadista imtaxaanaadka iyada oo ujeedku yahay shahaado siin dhammaadka marxalada
- In ay bixiyaan hubin dhab ah oo ku saabsan hawlqabad sanadeedka waxbarashada ardeyda ee heer qaran.

Wasaaradda iyo guddiga imtaxaanaadka qaran, labadooda waxa ay isla sameynayaan kormeer sahan xilliyeysan si loo cabbiro (ogaado) guulaha ardeyda ee heerka la xushay waxa ay wada qiimaynayaan guulaha iyo nuxurka.

## 13. KAALINTA WASAARADDA WAXBARASHADA

Wasaaradda ayuu xil ka saran yahay fulinta iyo dabagalka manhajka. Wasaaraddu waxay qaadaneysaa masuuliyadda hawlahan hoose:

- Horumarinta siyaasadda manhajka ayadoo loo maraayo waaxda manaahiijta.
- Gudbinta/dhigidda manhajka iyo kormeerka tayada gudbintiisa/qeybintiisa iyadoo loo marayo waaxda tayo dhawrka.
- Xaqiijinta qiimeyn sax ah ee mirodhalka iyada oo loo marayo nidaamka imtixaanka caadiga ah iyo habab qiimayn joogto ah.
- Xaqiijinta in nidaamka waxbarasho uu ilaaliyo heerarka loo cayimay mowduuc kasta oo waxbarasho ee heer walba ee ka dhex jira xarumaha waxbarashada oo dhan, waxaana kormeeraya guddiga imtixaanaadka iyo waaxda tayo dhawrka.

## 14. MAAL GELINTA MANHAJKA

Habsami u fulinta hadafka qaabdhismeedka manhajkan waxa ay ku xiran tahay in la helo taageero dhaqaale iyo mid farsamo oo joogto ah. Dawladdua waxaa ka go'an xaqiijinta waxbarasho tayeysan oo ay helaan dhammaan ubadka Soomaaliyeed . Si taasi loo gaarana Wasaaradda Waxbarashada waxay::

1. diyaarinaysaa, si simmanna u gaarsiineysaa dhammaan agabka loo baahan yahay ee ay ardaydu ku gaari karaan mirodhalka barashada..
2. tababareysaa shaqaalaha si ay u kasbadaan aqoonta iyo xirfadaha munaasibka iyo lagama maarmaanka ah ee lagu caawini karo hirgelinta manhajkan.

3. diyaarineysaa jawi u suuragelinaya daneeyayaasha waxbarashada ( stakeholders) in ay buuxiyaan qeybaha kaga aaddan helitaanka waxbarasho tayeysan.
4. ku garabsiineysaa hay'adaha aan dawliga aheyn ee xiiseeya in ay wax u qabtaan heerarka kala duwan ee waxbarashada.
5. Baadigoobeysaa taageero farsamo si loogu suurageliyo dhammaan ardeyda in ay helaan waxbarasho tayo leh oo loo siman yahay.

## 15. XILLI - DUGSIYEEDKA IYO SAACADAHA UGU YAR EE WAXBARISTA

Xilliga sanad-dugsiyeedka waxbarashada tooska uu noqonayo sanad waliba waxa lagu saleynayo saacadaha waxbarista ugu yar iyo toddobaadyada hoos ku xusan. Wakhtiyeyntu waa ay isbeddeli karaan marka laga eego cimilada iyo xilliyada hase yeeshee saacadaha waxbaristu waa isku mid. Dugsiyada dalka xilliga ay ku shaqeynayaan waa midkan hoos ku xusan. Waxaa kaloo loo baahan yahay in la tixgiliyo ardeyda dhuga badan (gifted ) ee waxbarshadoodu sarreyso ee qaadan kara saacado yar iyo ardeyda liita ama ka gaabiya waxbarashada ama kuwa baahida gaarka ah qaba waxaa laga yaabaa in wakhtiga waxbarasho loo kordhiyo, saacado badanna ay helaan. Isbeddeledan waxa ay dhici karaan keliya marka heshiis gaar ah lala galo Wasaaradda waxbarashada.

**Tusaha17: Xilli - dugsiyeedka Dugsiga iyo Saacadaha waxbarista**

| | **Tilmaan** | **Dhererka Wakhtiga** |
|---|---|---|
| | Sanad Dugsiyeedka | Laba xilli (simistar) |
| | Xilli dugsiyeedka | Xilliga 1aad: Agoosto ilaa Disembar.<br>Xilliga 2aad: Janaayo ilaa Maajo |
| | Toddobaad waxbarasho | 36 toddobaad sanadkiiba |
| | Maalmaha dugsiga | 6 maalmood ( Sabti ilaa Khamiis) |
| | Xisadaha toddobaadkii | 42 xisadood |
| | Muddada xisadaha | Dugsiga Hoose iyo Dhexe 40 daqiiqadood Dugsiga Sare 45 daqiiqadood. |
| | Tirada saacadaha halkii sano dugsiyeed. | **Dugsiga Hoose/Dhexe 1008 saacadood.**<br>**Dugsiga Sare 1134** saacadood sanadkiiba |

### Saacadaha Waxbarashada Assaasiga ah

| | Maado | Dugsiga Hoose | | | | | Dugsiga Dhexe | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | 1 | 2 | 3 | 4 | | 5 | 6 | 7 | 8 |
| 1 | Tarbiyah | 5 | 5 | 5 | 5 | | 5 | 5 | 5 | 5 |
| 2 | Saynis/Caafimaad | 5 | 5 | 5 | 5 | | 5 | 5 | 5 | 5 |
| 3 | Xisaab | 6 | 6 | 6 | 6 | | 6 | 6 | 6 | 6 |
| 4 | Soomaali | 7 | 7 | 6 | 6 | | 6 | 6 | 6 | 6 |
| 5 | Carabi | 6 | 7 | 6 | 6 | | 6 | 6 | 6 | 6 |
| 6 | English | | | 5 | 5 | | 5 | 5 | 5 | 5 |
| 7 | Cilmiga Bulshada | 5 | 5 | 4 | 4 | | 4 | 4 | 4 | 4 |
| 8 | Barbaarinta jirka | 4 | 3 | 2 | 2 | | 2 | 2 | 2 | 2 |
| 9 | Farshaxan | 3 | 3 | 2 | 2 | | 2 | 2 | 2 | 2 |
| 10 | Teknooloji | 1 | 1 | 1 | 1 | | 1 | 1 | 1 | 1 |
| | | | | | | | | | | |
| | **Wadar** | 42 | 42 | 42 | 42 | | 42 | 42 | 42 | 42 |
| | | | | | | | | | | |
| | **28 saac usbuucii** | **4.67 saac maalintii** | | | | **1008 saac sannadkii** | | | | |

### Saacadaha Waxbarashada Dugsiyada Sare

| | Maado | Xiso | Daqiiqo | Saacad | Saacad | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| | | Usbuucii | Xisaddii | Usbuucii | Sannadkii | % |
| 1 | Tarbiyah Islaamiyah | 5 | 45 | 3.75 | 135 | 12% |
| 2 | Bayoloji | 3 | 45 | 2.25 | 81 | 7% |
| 3 | Kimistari | 3 | 45 | 2.25 | 81 | 7% |
| 4 | Fiisikis | 3 | 45 | 2.25 | 81 | 7% |
| 5 | Soomaali | 3 | 45 | 2.25 | 81 | 7% |
| 6 | Carabi | 5 | 45 | 3.75 | 135 | 12% |
| 7 | English | 5 | 45 | 3.75 | 135 | 12% |
| 8 | Taariikh | 3 | 45 | 2.25 | 81 | 7% |
| 9 | Juqraafi | 3 | 45 | 2.25 | 81 | 7% |
| 10 | Xisaab | 5 | 45 | 3.75 | 135 | 12% |
| 11 | Barbaarinta jirka | 1 | 45 | 0.75 | 27 | 2% |
| 12 | Tiknooloji | 2 | 45 | 1.5 | 54 | 5% |
| 13 | Ganacsi | 1 | 45 | 0.75 | 27 | 2% |
| | | | | | | |
| | **Wadar** | **42** | | **31.5** | **1134** | **100%** |
| | | | | **5.25** | | |

## 16. Eray-bixinnada erayada farsamo ee la adeegsaday

Waxaa jira baahsanaan ballaaran iyo jahwareer la xiriirta eray-bixinta ay adeegsadaan manhaj qorayaashaiyadoo sababtu ay tahay khubarada waddanno kala duwan ayaa u isticmaala erayo kala duwan waxyaabo isku mid ah, sidaa darteed, waxaa hoos ku xusan eraybixin kooban ee ku saabsan ereyada lagu adeegsaday qoraalkan:

**b) Qaab-dhismeedka Manhajka**
Kani waa qoraal ballaaran ee si cad loogu qeexay ujeeddooyinka, qiyamka isla markaana taxaya mirodhalka ballaaran ee laga filayo waxbarashadawuxuuna ku shaqeeyaa aas-aaska horumarinta muqarrarka maaddada isagoo ogolaanayo xulashada ballaaran marka la barbardhigayo manhaj dhaqameedkii hore. Kani ma aha inuu tilmaamayo baaxadda, iyo silsiladda hawsha, balse wuxuu muujinayaa mirodhalka waxbarasho ee la filayo heer kasta. Wuxuu culeyska saarayaa heerka laga rabo marxalad kasta. Waa wado waxtar u leh isla socodka ardeyda ku kala duwan garaadka iyo awoodda.

**t) Qiyamka**

Waxaa filayaa in qiyamka si fiican loo fahmay, si aad u ballaaran ayaan uga soo hadalnay intii aan ku soo jirnay qaabdhismeedka manhajka, waxaa muhiim ah in uu ka muuqdo dareenka bulsha weynta Soomaaliyeed.

**j) Yoolka**
Yoolka waxaa loo qaadan karaa micne ballaaran sida himilooyinka iyo waxa la rabo in la gaaro. Guud ahaan waxaa la isku raacsan yahay in manhajku kaabayo bartilmaameedka laakin kama guul keeni karo keligii. Haddaba, bulsho caafimaad qabta, jir ahaana dhisan waxa noqon kara yool, ama deegaan hormarsan oo nabdoon. Hase ahaatee labada xaaladood,waxbarashada waa ay kaabeysaa gaarista bartilmaameedyadaasi. Waxaaxusid mudan inwasaaradahacaafimaadka iyowarshadaha ay kaalin mug leh ku leeyihiin.

**x) Ujeeddooyinka guud iyo kuwa gaarka ah**
Waa wax adiga aad ula jeeddo in manhajku uu gaaro iyada oo aan loo baahan taageero kale.Waa lidka kuwani waxa lagu qiimayn karo manhajka.

**kh) Mirodhalka Waxbarashada**

Mirodhalka waxbarasho waxa ay la mid yihiin ujeeddooyinka waxayse ku kala duwan yihiin halka culeyska la saarayo. Mirodhalka waxbarashadu waxa ay culeyska saareysaa waxa aan ka fileyno natiija ahaan waxbarasho la fuliyay. Waxa ay qeexeysaa guulaha waxbarasho ee laga filayo ardeydu in ay gaarto dhammaadka heer gaar ah. Muqararrada waddamada qaarkood waxa ay ku magacaabaan heer (standard). Haseyeeshee, waa la tilmaami kara faraqa u dhexeeya manhaj ku salaysan mirodhal iyo midka ku salaysan ujeeddooyin.

Midka hore, waa manhaj ku saleysan mirodhalka la filaayo dhammaadka heerka marka loo eego ardeyda iyo waxa ay barteen. Manhajka ku saleysan ujeedooyinka bartilmaameedka manhajku waa bilowga habka. Farqiga waxaa dhici karta inuu yar yahay ujeedooyin badan ayaa loo tibaaxaa mirodhal ahaan iyada oo keliya ay ku kala duwan yihiin sida loo sheegay.

Arintu si kasta ha ahaatee, caalamka wuxuu u batay dhanka mirodhalka tobankii sano ee dambe waxa ayna culeyska saareen ardeyda, badalkii macallinka. Qoraalkaani waxaa ujeedooyinka u isticmaalnay in lagu qeexo waxaa wasaaradda iyo dowladda ay rajeynayaan gaaristooda, dhanka kale natiijada waxbarashada waa xoogga dhaqaajiya horumarinta manhajka iyo u qeybintiisa taxanayaal ah muqarrarada maaddooyinka.

**d) Hanashada**

Hanashada dhab ahaan waa mirodhalka barashada oo loo kala qaybiyey qaybo yar yar. Qaybo u suurageliya in bartayaashu ay ku hanan karaan mirodhalka. Halka marka uu dal isticmaalayo ereyga heer (standrad ), waxa ay u adeegsadeen “mirodhalka barashada in ay la micne tahay cutubyadan yar yar". Tusaale ahaan, haddii hiigsiga mirodhalku uu yahay in uu ardaygu awoodi karo in uu si fiican u akhrin karo faqro af-soomaali ah oo uu fahmi karo. Kartida lagu dhisaayo tani waxa ka mid ah inuu awoodi karo in uu aqoonsado dhawaaqyada xuruufaha.

- Ku dhawaaqi karo hal dhawaaqle
- Aragti ku aqoonsan karo erayo
- Samayn karo sumadaynta

Natiijada ka dhalata middani waxa uu ardaygu markan si fiican u akhrin karaa faqro waana fahmi karaa. Haddaba, mirodhalkii waa la gaaray. Haddii si ballaaran loo eego waxa loo arkaa in la gaarayo mirodhalka barashada. Marka dal kale u isticmaalo mirodhalka barasho heer ahaan waxa ay la micne tahay cuytubyo yar yar.

**r) Heerarka**

Waxa ay tilmaamayaan ka gudubka marxalad gaar ah marka tiro cad oo waxa la filaayo in la gaaro loo qoro mirodhal barasho ahaan, oo la barbardhigo tiro bartilmaameedyo la qimayn karo. Dhererka marxaladdani oo kale sida qaalibka ah waa 3 ilaa 4 sano. Lama mid ah fasal sababta oo ah arday kala duwan ayaa ku gaari doona mirodhalka loo baahan yahay heerar kala duwan. Hase ahaatee, 4 sano ka dib waxaa dhici karta in la gaaro 70% mirodhalka laga doonayay heerka 1aad. Si kastaba ha ahaatee 15% waxa dhici karta in hore loo gaaray iyo in lagu sii dhow yahay heerka 2 iyo in 15% kale ay u baahan tahay lix bilood kale ama ka badan ka hor inta aan la gaarin heerkii la filaayey. Waxaa haboonaan laheyd in aan dhammaan ku wada heshiinno eraybixinta arrintani.

**s) Muqarrarka**

Ereyga muqarrar waxa aan u isticmaalnaa inuu yahay tafaasiisha waxa lagu baranayo maaddo kasta. Muqarrarku waxaa uu ku saleysan yahay barasho mirodhal baaxad ballaaran leh, waxaana loo dejiyaa in lagu gaaro kuwani. Muqrararka waxaa la qoraa marka lagu heshiiyo mirodhalka ballaaran ee barashada iyo mowduucyada la baranayo. Muqarrar kasta ee maaddo waxa uu yeelanayaa sababayntiisa iyo mirodhal barasho oo loo kala jejebiyey awoodo. Waxa dhici karta in mowduuc barasho oo gaar ah lagu siiyo tixgelin gaar ah hal muqarrar ama muqarraro kala duwan taaasi waxa ay ku xiran tahay heerka iyo baahiyaha bartaha. .